JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare

# MURTI iyo SHEEKOOYIN



Qore: Cabdulqaadir F. Bootaan

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA
**Wassaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare**

# MURTI iyo SHEEKOOYIN

Cabdulqaadir F. Bootaan

31kii Luuliyo 1973

MUQDISHO

# ARAR

*Buuggaani guud ahaan wuxuu ka kooban yahay* ***Murti*** *iyo Sheekooyin wax isku dhafan iyo wax kala qaadamba leh, oo aan af shisheeye iyo dhaqankood midina tarrixin ee Soomaali takhtiya wada ah.*
*Wuxuuna isla markaa horseed u yahay shaac - bixinta Suugaanta Soomaaliyeed ee aan dabayaaqada lahayn.*

*Murtida buuggaa ku jirtaa waxay u kala baxaysaa; Gabayo, Maahmaahyo, Halxiraale, Majaajillo iyo kuwo iyana waji kale leh oo aan marna laga xiisa gooyn karin.*
*Sheekooyinku sidoo kale, iyana waa qayb murti isugu caana shubanaysa iyo qayb maaweelo ahaan loogu tala galay oo wada dhaxalgal ah.*
*Intubana waxay ku qotomaan dhaqanka iyo hiddaha asaliga ah, oo Eebbe ku galladaystay Ummaddiisa Geeska Afrika ku nool (Soomaaliya).*

*Haddii xag kale loo eego, meeriska ugu horreeya tan iyo kan ugu dambeeya waxaa ka il tiran; Macnaha erayada adadag ee mid kasta ku jira, weydiino garwaaqsiis u ah sheeka walba, hadallo macnohooda la qeexayo iyo meelaha qaafkood oo siyaabo gaagaaban in looga hadlo laysha rabo. Sida kale, waxaa wax looga taataabtay xagga naxwaha, oraaho iyo weero laaxin ku jiro oo sixid u baahan maskaxdana aad uga shaqaysiinaya. Waxaa kaloo iyana lagala kulmayaa meelo bambannaan oo la buuxinayo ee waqtiga isdhaafinti iyo meeriska xusuusnaanti loo saantey, iyo ugu dambaystii weero sheeka walba layligeeda u dambeeya, oo runtooda iyo beentooda la kala caddaynayo.*

*Buuggaani wuxuu u qalmaa loona qaadan karaa, Suugaanta Dugsiga Dhexe laga dhigo iyo mid dadweynuhu akhristo labadaba. Wuxuuna xiisa gaar ah ku leeyahay, isagoo bilawgiisa iyo dhammaadkiisaba aan wax saluugma ahi ku jirin macallin la'aanna aad isbari kartid, iyo isagoo xagga Afka Soomaaliga wax weyn kaa tarahaya.*

**C. F. Bootaan**

Bogga siddeedaad, layligiisa labaad meesha ah sida tan ugu horraysa; waa dhurwaa dhurwaayo.

# M A H A D N A Q

Waxaan aad iyo aad ugu mahad celinayaa Jaalle Warsame Iidle oo ka mid ah Ciidanka Booliska Soomaaliyeed, Jaalle Cabduiqaadir Jaamac (Gacamey) iyo aabbahay Faarax Bootaan oo intuba iga kaaliyey xagga sheekooyinka. Waxaan kaloo aan si weyn ugu mahadnaqayaa Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare oo iga gargaartey dhanka qalabka, iguna geesinnimo gelisey inaan karaankay wax qabto, taasoo la'aanteed aan waxba ii suura galeen.



## NIN IYO AFADI

Meel col looga kala cararay oo dadkii waa hore ka guurey, ayaa waxaa galab soo degey nin iyo afadiis. Ari xoogaaya oo badi dhalahaya, awr cadha qaba iyo aqal yarna waa wateen. Ninka iyo afadiisu wiil aan saa u weyneyn bay isu lahayeen, oo labaduba ay ku curteen. Wiilka maalintiina habartaa xambaari jirtey, habeenkiina odaygaa hoosta gelin jirey isagoo uga baqaya inuu bahal qaato.

Galabtaas ay ninka iyo afadiisu meesha soo degayeen aad iyo aad bey col uga baqsanaayeen, oo awal bey warkeeda qabeen. "Intayna qorraxdu dhicin aan ariga sii oodee, orodoo ceesaamihii magacyo fiifiican u soo bixi", ninkii baa afadii ku yiri. Gocrtay arigii dhex tagtay bay magacyo laga boqo ceesaamihii u kala bixisay, oo waxay tiri; "Ka bax ! ka bax ! waa col ! waa col ! war ka tag ! war ka tag !".

Ninkiiyoo meel agteeda ah oodo ka jarayey baa maodey inay naagtu col aragtay oo isaga u digeyso, markaasuu isagoon deena deyin daraadda habsadey. Iyana markay argtay isagiiyoo meel aan dhaweyn sii ganan bay ka daba farma' tiri iyadoo yarkii xambaarsan, una haysata inuu ninku col ka cararayo.

Muddo shan saacadood ah markay ordayeen, oo ay daaleen ayay istaageen. Markaasaa ninkii ku yiri; "Naa ma col baad aragtay?" Markaasay ku tiri: "Col ma arage adigoo cararay baan ku arkay." Ninkii baa intiisii xumayd inta isku kacday, waran uu sitey naagtii caloosha kaga soo ridey, wiilkiina meeshii cidlada ahayd buu uga tegey.

Halkaas ayuu ninkii ka soo guureeyey oo arigii, awrkii iyo aqalkii dib ugu soo noqday. Qorraxdu markay soo baxday buu meeshuu xoolaha ku ogaa yimid, mise arigiina dhurwaa baa laystay, awrkiina libaax baa cunay.
Goortaasuu wiilkii dib ugu soo laabtay isagoo is leh; haddii xoolihii ku dhaafeen allaylehe yarkaaga korso, mise isagiina markuu ka dhaqaaqay bay dadqalato qaadatay oo carruurteedii naf uga dhiktay.

**Ninkii maalintaas ayaa miyir iyo maskaxba ugu dambeysey, hadalna wuxuu ka yiri :**

"Maxaa iiga roon inaan cararoo
"Caadkiyo daruuraha cirkaas gala oo
Shimbiraha cimrigood caweysima iyo
Ka qayb galo calanyartaas cida".

**M A C N A Y N**

**cadho** : cudur jirka gala
**afadiis** : oordiis, araddiis
**ceesaamihii** : riyaha aan weli curan
**oodo** : dhacmo
**daraadda habsadey** : cararay

1. **L a y l i**

**W e y d i i n o :**

1. Meesha ninka iyo afadiisu degeen maxay ahayd ?
2. Galabtay meesha soo degeen wax ma ka baqayeen ?
3. Magacyada naagtu ceesaamaha u bixisay maxaad u qaadan lahay ?
4. Afada iyo ninkeedu maxay isaga daba carareen ?
5. Markay istaageen muxuu ninkii yiri ? Muxuuse falay ?
6. Wiilkii yaraa inay dadqalato qaadatay goormuu ninkii ogadey ?

2. **Waxaad dhigtaa ugu yaraan toban sadar ugu badnaanna shan iyo toban, oo aad ariga kaga sheekeyneysid.**

3. **Erayadaan soo socda wadartooda qor sida tan ugu horraysa.**

| | |
|---|---|
| xero - **xeryo** | habeen |
| meel | saacad |
| ceesaan | galab |
| dhurwaa | dadqalato |
| goor | shimbir |

4. **Meelaha bambannaan erayada ku habboon geli sida labada u horeeysa.**

1. Meesha ninka iyo afadiisu soo **degeen** cidlay **ahayd.**
2. Naagta iyo ninku ......... bey isu .........
3. Markuu ninku ......... maqay buu .........
.4 Naagtu waxay ......... inuu ......... col arkay
5. Ninku ......... waran buu ku ......... .

5. **Weerahaan hoose tii run ah horteeda RUN ku dhig, tii been ahna BEEN ku dhig**

b. Carrada reerku degey bahalkaa ku badnaa. ———
t. Ninku markuu cararay wax bay la noqotay. ———
j. Labadcodii midba meel buu u cararay. ———
X. Bahallada ariga laayey weer baa ku jirey. ———
kh. Ninku aad buu u samir badnaa. ———

**Maahmaahyo :**

1. Fulayoow libi kuu dhawaa.
2. Wax hubso hal dhan baa la siistaa.
3. Hadday degdegsiinyo door dhalaan, kaadsiinyana kiish lacagahay dhali lahaayeen.
4. Intaadan falin ka fiirso.
5. Talaxume tol ma badiyo.

# L A B A L A B O
## ( m u r t i )

Waxaa jira labalabo dadka oogadiisa ka mid ah oo lababa si isku tahay.
Kuwo waa jaalayaal aad isu jecel, oo isgargaara. Kuwo way isxushmeeyaan. Kuwo way isu go'aan, oo ma kala dambeeyaan. Kuwana waa col weligood isu daran oo isneceb.

**Waxayna kala yihiin :**

a. Laba isqaadda
e. Laba isa sugta
i. Laba isla dhimata (odayadii horaa yiri)
o. Laba kala dhimata
u. Laba isneceb.

a. Labada isqaaddaa waa labada gacmood, oo haddi midi dhaawacanto tan kalaa lagu qaadaa.

e. Labada isa sugtaa waa labada lugood, oo marka qofku soconayo lug waliba jeeray tan kale soo kacdo oo horteeda istaagto ma dhaqaaqdo.

i. Labada isla dhimataa waa dhagaha. oo ma jiro wax dhaga leh oo mid wax ka maqlaya, midna beelay (odayadii horay la neqctay).

o. Labada kala dhimataa waa indhaha. Marka mid dhacdo tan kale waa sideedii, inay ayaamaha hore bocydo ma ahee.

u. Labada isnecebina waa sanka iyo dubburta, oo marka dubburtu neecaw qurmuun sii deyso bay sanka u urtaa, markaasuu inta ka sii jeesto uf yiraahdaa.

**Waxaa kaloo jira, markuu qofku aad u gaboobo lix oogadiisa ka mid ah oo lababa isku si noqoto.**

a. Labo way qoydaa;

e. Labana way qarqadhaa.

i. Labana wuu qaadi waayaa

a. **Labada qoydaa waa labada indhood.**

e. **Labada qarqadhaana waa labada gacmood.**

i. **Labada uu qaadi waayaana waa labada lugood.**


**Labalaba kale oo isla dadka ku saabsan.**

Qofku tan iyo intuu ka dhimanayo lix waxyaalood baa lababa meel ka kala ordeysaa.

a Hawo iyo Hunguri way hor ordayaan.

e. Gaboow iyo Geerina way daba ordayaan.

i. Faa'iido iyo Khasaarana labadiisa dhinac bay kala ordayaan.



## LIBAAX IYO DHURWAAYO

Waa aan dhaweeyn dheerayna, oo abaar badani dhacday, ayaa waxaa isu yimid sagaal dhurwaa oo heshiis ahaan jirey. Sagaal-koodu waxay ka wada hadleen siday abaarta uga bixi lahaayeen, oo naftoodu ku ammaan geli lahayd.

Waxay wax isla 'eegeegaamba, talo waxa uga ururtay inay dadka xoolaha ka dhacaan si xilligaa xuni uusan waxyeello ugu geysan.

Dhurwaayadii waa ay soo duuleen, oo xoolo raadcadood galeen. Iyagoo meel maraya ayuu libaax keligiis ahi ka hor yimid, oo isna yaabban. Markaasuu ku yiri, "Dhurwaayoow aan idin raaco oo jaallihiin noqdo". Goortaasay ugu jawaabeen; "Haddaad na raacdo hadhoow heshiin meynee naga tag". Suuye, "Maxaan u heshiin weyney jaallayaal ?
"Libaax waad cir weyn tahay, oo waad na boobi doontaa", iyagii baa ugu warceliyey. Markaasuu dhaar ku yiri; "Wiil iyo walaal ku waayee inaanan idin boobeyn, waxaad ku talisaan baana yeelayaa".

Goortaasay "hawraarsan" yiraahdeen, oo dabadeedna kobtii iska raaceen.

Waxay tobankoodii wada socdaamba, geel caweysinkii miranayay sagaal halaad iyo awr qurbac ah baalka ku dhufteen, oo talakhla oomman ka tuureen. Goortay laba maalmood wadeen bay gaajadii haysey aan iska reebno isku waraysteen. Libaaxii baa ku yiri; "Anigu keligey baan ahaye idinkaa iga badane qaybta inoo ku dhaqsada "Waa ka diideen, kuna yiraahdeen iyagoo ku xurmaynaya; "Adigaa Boqorka bahallada ahe xoolaha inoo qaybi." Suuye; "Haddee ma ku go'daan sidaan wax yeelo? Jawaabtoodu haah bay ahayd.

Goortaasuuye; "Idinku sagaal baa tihiin awrka qurbaca ahaana idin ku toban ah, anna sagaalka halaad baan toban ku ahay".

Dhurwaayadii iyagoo caro darla' ay ka siriqsan tahay ayuu midkood yiri; "Jaallayaal qaytii sidaas ha ku dhammaato, aammin bahalna intaas ha ku dhammaado".

**M A C N A Y N**

**soo duleen** : soo col-keceen

**rimmay** : neef dhalaya oo aan soo sed dhaweyn

**qurbac** : rati habarti ku irmaan

**talakhla oomman** : meel cidla' ah

## Layli

**1.**

**Weydiino :**

1. Sagaalka dhurwaa isu imaadkooda maxaa ku wacnaa?
2. Yaa ka hor yimid sagaalkooda? Muxuuse ka codsaday?
3. Libaaxa iyo Dhurwaayadu dantay lahaayeen maxay ahayd?
4. Xoolahay soo dheceen yaa qaybshey?
5. Maxay qaybtii ku dhammaatay?

2. **Oraahahaan soo socda wadartooda qor sida tan u horraysa.**

| | |
|---|---|
| dhurwaa | bahal |
| hal | duullaan |
| qurbac | ayaan |
| abaar | neef |
| maalin | |

3. **Libaaxa iyo dhurwaaga midba intaad ka sheegi kartid ka hadal.**

4. **Waxaad qortaa toban halaad oo geel ah magacyadood sida Dhunkad iyo shan dugaag magacyadood sida Libaax**

5. **Meelaha bambannaan erayada ku habboon ku qor sida tan u horraysa.**

1. Waa baa abaar weyni dhacday.
2. Waxaa israacay ......... dhurwaa iyo .........
3. Waxay socdaamba waxay soo ......... sagaal ......... iyo qurbac.
4. Libaax baa ......... qaybshay
5. Dhurwaayadii waxay ......... awrkii yaraa, libaaxiina ......... halaad.

6. **Weerahaan hoose tii run ah RUN ku hor qor, tii been ahna BEEN.**

b. Libaaxu xaqdarro ma samayne wuu cir weynaa. ———

t. Sidii libaaxu wax u qeybshey waa lugu diidey. ———

j. Dhurwaayadu hadday qurbaca iimaansadaan wuu ku fillaan lahaa. ———

x. Bahalladu markii dambe heshiis bay ku kala tageen. ———

**Maahmaahyo:**

1. Nin soori qaadday nin seefi qaadday baa ka roon.
2. Hal libaax arkaysaa say ku godlatana ma taqaan, say ku diiddana ma taqaan.
3. Qorina qiiqiisuu uraa qofna qawlkiisuu hadlaa.
4. Geeljire isagoo usha meeshuu ka goynayo og buu ku ogaal weydiiyaa.
5. Nin quwaax hela, nin qaroon hela, carro waa quude halla qarafsado.
6. Suri waa nin ku jabsi, sagaarana waa laba nin ku dubad, sagaal halaadna waa saddex nin ku maal.

# G A B A Y
## (Maxamed Ismaaciil)

Maxamed Ismaciil oo ka mid ah nimanka Soomaaliyeed ee gabya qarnigaan labaatanaad, isagoo Far Soomaalida fudayd-keeda iyo dhaxalgalkeeda ka hadlahaya, caddaynayana inaan af shisheeye cidna aqoonta sare kaga haqab beeleyn wuxuu gabay ku yiri:

"Nimanyohow Far Soomaalidaa fiicanoo ladane
Fudayd bay u dhigantaa ninkii fiirsadoo qora e
Fagaaraha wixii lala tagoo faansan wayada e

Farsamadii nin Soomaaliyaa lagu fogaadaaye
Fariidnimo wax lagu maamuloo feeyig baa wacane
Faduul bey ku tahay ruux mid kale faal u dhigayaaye

Furihii afkaba waa iyada foori kay tahay
Faruuryaha wax laga sheego bay faqa ku koobtaaye
Ficilla ugu kaca waa dhulkoo lagu fariistaaye

Faallada kasmadu waa sidii fiidda geedaha e
Nin waliba fartiisuu ku qoray faaftay waa hore e
Ficiin abadankiin waa inaad teenna fulisaane".

# NIN WAALAN

Nin baa xoolihii dhaafeen, carruuurtii iyo afadiina ka geeriyoodeen. Markaasuu aad u calool xumaaday, oo ugu dambayntii waalli ku dhuftay. Isagoo meel khashinqub ah yaalla, ayaa Guulwadayaal arkeen. Intay ka nexeen oo soo qaadeen bay u qubeeyeen, makhaayad meesha ka dhaweydna cunto ka siiyeen.

Dabadeed, Guulwadayaashii Isbitaalkay ninkii geeyeen si caafimaadkiisa loo daryeelo.

Takhaatiirtii markay arkeen ninku siduu yahay, ayna ogaadeen wixii ugu wacnaa bay dhar wanaagsan, sariir caafimaad qabta iyo cunto macaan siiyeen. Kabo dacas ah oo uu ku socdo, saabuun uu ku qubeysto, shaambo uu tinta ku mayrto, saliid daawa ah oo xididdada madaxa qaboojintooda loogu tala galay, shanlo iyo muraayad uu isku daawadana waa la hantisiiyey. Intaasoo dhan waxaa ka daran, daawada ay had iyo gooraale siin jireen.

Maalintii dambe, isagoo Isbitaalka dabaqiisa dhexe ka soo kalleetiyaya yaa meeshii ay ku dhacaysey waxaa soo maray Xoghayihii Wasaaradda Caafimaadka oo booqasho Isbitaalka u tegey iyo Guddoomiyihii Isbitaalka. Markuu arkay inay hoostiisa marayaan buu kaadidii joojiyey, oo yare isbabcay. Markaasay aad u farxeen, oo waxay moodeen inuu biskoodey oo iyaga ka xishooday, kuna yiraahdeen; "waryaa ma biskootey ?" Suuye ; "Iyaa ! ma xariggayga aan dhulka u soo ritey baad rabtaan inaad soo qabsataan, oo aniga qudha iga jartaan. Yux idiin leh ! xariggaygiina la noqday".

Ninka waalani wuxuu moodey inay kaadidu xarig tahay, oo ay Xoghayaha iyo Guddoomiyuhu soo qabsanayaan, dabadeedna isaga waxyeellayn doonaan. Markaasay inta aad u nexeen waxay ogaadeen inuusan biskoon.

## MACNAYN

**hantisiiyey** : mulkisiiyey

**Guulwadayaal** : ma daalayaal

**qudha** : nafta

## 1. La yli

**Weydiino:**

1. Ninka waalani meeshuu tegey maxay ahayd? Maxaase geeyey?
2. Guulwadayaashu markay ninka heleen maxay yeeleen?
3. Ninka waalani markuu soo kalleetiyayey ma miyir qabey?
4. Markuu Xoghayaha iyo Guddoomiyaha arkay muxuu kaadidii u joojiyey?
5. Markay Xog. iyo Gud. arkeen inuu kalleetidii daayey maxay moodeen?

## 2. Erayadaan hoose wadartooda qor.

| | |
|---|---|
| muraayad | kab |
| makhaayad | sariir |
| Guulwade | shanlo |
| Xoghaye | tin |
| Guddoomiye | Isbitaal |

## 3. Waxaad qortaa shan iyo toban sadar oo aad Guulwadayaasha kaga sheekeyneysid.

## 4. Erayada soo socda weero geli.

khashinqub, wanaagsan, macaan, caafimaad, arkay, moodeen, farxeen, rabtaa, Guulwade, leh.

## 5. Meelaha bambannaan oraahaha ku habboon ku qor.

1. Ninku markuu ......... seexday .........waallaa.
2. Guulwadayaashu markay ......... heleen way u .........
3. Ninka waxaa ......... keenay .........
4. Takhaatiirtu ......... wanaagsan ......... u daweeyeen.
5. ......... iyo ......... waxay moodeen niuu biskoodey.

## 6. Weerahaan hoose tii run ah horteeda RUN ku qor, tii been ahna BEEN ku qor.

b. Wuxuu ninku waashay markuu guriga ku cidlaystay. ———

t. Kaadidu marmar xarig way noqon kartaa. ———


j. Isagu wuxuu moodey inay kaadida ku caayi doonaan. ———

x. Markuu ninka waalani kalleetiyayey dan buu lahaa. ———

kh. Dabadeed Xag. iyo Gud. waxay garteen inuu biskoodey.———

**M A A H M A A H Y O :**

1. Arrad waa dan uskagse waa doqonniimo.
2. Arrin xumo abaar ka daran.
3. Arrin ku dhaaftay aah ma celiso.
4. Nin waalani hadduu qoslo nin miyir qabaana waa qoslaa.
5. Minja dhooqo midba mar baa la baxshaa.




## SACLE IYO DAMEERLE

Laba nin baa waa isku meel degganaa. Nin wuxuu lahaa sac rimman, ninka kalana dameer iyana rimmay ah. Nin waliba neefkiisa sidii ilmo jirkiisa ka soo go'ay buu u dhaqaalayn jirey. Saca iyo dameertu maalintiina isku meel bay daaqi jireen, habeenkiina xeray ku wada hoyan jireen oo way isjeclaayeen.

Goortay sicii iyo dameertii soo sed dhaweeyeen bay labadii nin aad iyo aad u farxeen, oo nayaayiro wanaagsan iyo iimaan badani qalbiga ka galay. Mid waliba wuxuu Ebbihi ka tuugi jirey inay tiisu ilmo dheddig u dhasho, si ay ugu tarmaan oo wax meelmar ah ugu noqdaan.
Ayaantii dambe, ayaa sicii iyo dameertii foolhallaabeen oo hayjad cidlà ah ku dhaleen. Mid waliba waxay dhashay neef dheddig, waana siday nimanku Ilaahood ka codsan jireen. Intay meeshaas joogeen, wax bahal ah ama tuug ah il ma ay saarin oo nabadgelyey kobtooda ku heleen.

Labadii nin intay sibraar biyo ku soo qaateen bay raadkoodii qaadeen, oo raadco ay tub dheer u mareen ugu dhaqaaqeen. Markay laba maalmood iyo habeen raadkii ku taagnaayeen,

bay sicii iyo dameertiiyoo weyl iyo dameer kala haysta u yimaadeen. Goortaasay farax darla' sacab halkeer ka qabsadeen. Sacabkii baa kii dameerta lahaa ku yiri :

"Afcadeey dameertaydooy
Afar qoobab dhagax leeyey
Waanigii ku aamminaye
Soo weysha ma ad dhalin ?"

Kii saca lahaa oo erayada kan han ka caraysan baa isna sacabkii ku yiri :

"War sucu waa daruur roob
Weyshuna waa dayax habeenaad
Daanka intaanan kugu dhufan
Dameerahaaga iga wado.

Labadii nin muran baa ka dhex dhashay markay isu afceliyeen, mid kastaana weysha inay tiisu dhashay buu ku dooday. Markaasuuye saclihii; "Adeer wax waliba taariikh bay leeyihiin, horna looma arag dameero weyla watee haddaad gar qaadan weydey inakeen Sharciga qabannee". Isla markiiba meeshii magaalo ugu sokeysey bay xoolihii u kexeeyeen, oo Qaalli hoose gartii u bandhigeen.

Sidii wax kale looga sugayey buuye, Qaalligii: "Haddii aan wax indha indheeyey, asaan neefafkaan ad wadataan dhab ugu fiirsaday, weysha waxaa dhalay dameerta, sucuna tan. kaluu dhalaye hortayda iiga taga hawl baan haystaaye".

Ninkii saca lahaa intuu ciil iyo caro u go'ay ayuu warqaad dacwo ah Qaalligii Sare ula tegey, sidii loo musuqmaasuqayna uga warramay. Goortaasuuye Qaalligii Sare; "Jaalle anigu caadaan helaye Qaalligii Hoose kula noqo, una sheeg inay arrintaasi ila soo deristey oo aanan gar niqi karine bal mar kale ha ku noqdo".
Markaasuu saclihii haddana Qaalligii Hoose fartiintii u keenay isagoo weli raadinaya inuu xaqu iftiimo. Qaalligii Hoose inta orod isku sii daayey ayuu kii sare u tegey. oo ku yiri; "Gacaliye, goormaad caadada heshay?" Suuye kii sare; "Marka dameeruhu weylo dhalaan ayay qaalliyaashuna caado helaan. Marka adiga laftaadu maalintii caadaad qabtey."

Goortay in door ah dooddii socotey buuye kii hoose, "Ilaahay ka cabso oo hay masabbidan yaan afku ku qalloocane". Suuye kii sare isna; "Ilaahay ka baq oo ummadda garsoore u noqo yaan indhuhu kaa dhicine, ogsoonowna sidaas aan raggu caado u heli karin inayna dameeruhuna weylo u dhali karin". Sidaa awgeed, ayaa labadii nin laysugu yeeray oo midba xaquu lahaa kobtii loogu naqay.

**M A C N A Y N**

**rimman** : wax dhalaya oo aan soo sed dhaweyn

**x e r o** : mooro

**hayjad** : meel

**sibraar** : xab yar oo aalaa caanaha lagu qaato

**raadco** : doonis

**nayaayiro** : yididdiilo, rajo

1. **L a y l i**

**W e y d i i n o :**

1. Maxay saca iyo dameertu rugtey joogi jireen uga tageen ?
2. Intee saacadood bay labada nin raadka soo hayeen ? Maxayse biyaha ku qaateen ?
3. Maxay nimanku cayaarta u qabsadeen ?
4. Goortay xoolihii heleen muxuu kii dameerta lahaa damcay ?
5. Qaalliga Hoose muxuu xukumay ?
6. Qaalliga Sare markuu lahaa caadaan qabaa muxuu ula jeedey ?
7. Markii dambe maxay arrintii ku dhammaatay ?

2. **Erayadaan hoose udhiggooda qor, sida tan ugu horraysa.**

| | |
|---|---|
| farax — naxdin | joogid |
| jacayl | sac |
| Dayax | orod |
| y a r | helid |

3. **Waxaad qortaa ugu yaraan shan siyood oo ay dameeraha iyo lo'du ku kala duwan yihiin.**

4. **Kobaha bambannaan oraahaha ku habboon geli.**

1. Labada adduunyada ahi ......... meel ......... daaqi jireen.
2. Labada nin ........ biyaha ku soo qaateen .........
3. Ninka ......... lihi ......... buu sheegayey.
4. Qaalliga ......... musuqmaasuq ......... ahaa.
5. ......... saca lahaa ......... buu qortay.
6. Markii ......... gartu siday ......... bay noqotay.

5. **Weerahaan soo socda RUN iyo BEEN ku kala dhig**

b. Dameeruhu marmar weylo way dhalaan. ———

t. Lo'du laba naas oo siman bay leedahay. ———

j. Lo'du dameeraha ka kacaana badan. ———

x. Sibraarka caanaha keliyaa lugu qaadan karaa. ———

kh. Qaalliga Hoose xaqdarruu naqay. ———

d. Qaalliga Sare inuu caado helay bay u dhaweyd. ———

**Maahmaahyo :**

1. Gartu Ilaaheedey taqaan.
2. Geedba mirihiisuu dhalaa.
3. Qaani ma qurunto ninkeed qaata inay weydo ma ahee.
4. Carrab dalab leh lug dalab leh laga garan og.
5. Run iyo beeni kala raad leh.

# QOSOL IYO MAAD

## (sacad iyo haasaawe)

Habeen baa meel cayaar lagu tumanayo, oo rag iyo dumar wax laysku leeyahay waxaa soo istaagey nin Maxamuud-gaanni la yiraahdo. Markaasuuye; "Meeday gabadha la yiri rag-gii bay ka af badisay?"

Intay aragtay bayte iyadoo soo maraysa:
"Oday dhaladu suun tahay
Afkuna soome (geed cad) ka cad yahay
Garkuna sayn dhurwaa yahay
Oo salaqdhabanayaa yimid."
Isagoon docna dayin buu meeshiiba ka cararay.

Nin doob ah, oo magiciisa Dhawre la oran jirey ayaa gabar inan ku weynaatey oo Miido la yiraahdo caashaqay.

Habeenkii dambuu iyadoo aqalka ardaagiisii raar ku samaysanaysa bawdka soo istaagey, oo isagoo yare baqsan tan-naago kula haasaabay.

Dhawre : Magacaa ba'yey Miidooy.
Muska iiga soo bood Miidooy.

Miido : Billay qodixi. i juq tiri Dhawroow.

Dhawre : Mandiil jeexdaan hayaa Miidooy.

Miido : Billaa dhiiggey hillaac Dhawroow.

Dhawre : Xareed mayrtaan hayaa Miidooy.

Miido : Billaan bararay oo hug iri Dhawroow.

Dhawre : Sabeen subag laan hayaa Miidooy.

Sidii bay yeeshay, dabadeedna way iscalfadeen.

# DAWOCO IYO DHURWAA

Dawoco iyo dhurwaa indha la', aad iyo aadna u fac weyn ayaa ari isugu jirey. Labadoodu waxay ku heshiiyeen inay dawacadu ariga raacdo isaguna aqalka joogo oo tuugada dad iyo dugaagba leh ka ilaaliyo. Iyada mageceeda waxaa la yiraahdaa Dawo isna Ciira-muruq-la', markay rabto inay danteeda ka qunsatana abti bay tiraahdaa iydoo ku sasabanaysa.

Dawacadu inta bahal ah oo Eebbe abuuray bay u sir badan tahay, oo dhurwaayo badan bay wax xil leh ku jirrabtay sida taariikhdeedu sheegeyso.
Maalintay ariga raacdaba ri' ama lax ayay dhexdiisa ku soo cuntaa, dhurwaagana hilibka wax ugama keento. Markaasay qurux miiran noqotay isagiina macaluul iyo foolxumo u go'ay. Neefkay maalintii cuntaba dabadiisey meel dhigataa, isaguna war iyo wacaalo toona uma hayo sirteedaa u qarsoon.

Dhurwagu habeen walba markay ariga soo xerayso buu ku yiraahdaa; "Dawo xaynta ii tiri kuma aamminsaniye". Goortaasay waa waxaas ka sir iyo caqliba badane intay ri' ama lax dhegta soo qabato taabsiisa, oo dhahdaa: "Abti tan koow dheh". markaasuu "koow" yiraahdaa. Haddana mid kalay u keentaa oo sidiiyoo kale ugu sheegtaa. Marmar kuway markii hore u keentay bay ku soo celisaa suu kala garan mahayee, markaasuu Allaahu run isaga qaataa.
Fiidkii markay ariga xareeyaan bay iyadu ka cayaarguddaa oo feceed booddo dhisanaya u kacdaa, isaguna kobtiisa madaxa iyo minjaha isgashadaa.

Dawo waxay arigii cuntaba, ri' keliyey ka reebtay. Goortay habeenkii ridii soo hoyisey buuye; "Dawo ii tiri xaynta." Markaasay inta u keentay tiri; "Abti tan koow dheh". Suuye, "Koow". Isla tii bay haddana ku soo celisey oote; "Tanna labo dheh". Goortaasuuye, "Labo". Siday keligeed ugu soo celcelineysey ayay tiradii arigu ahaa ugu ebidey, suu waa wax indha la'e inuu dhan yahay buu u qaatay.

Maalintii dambe, ayay ridii cuntay waxay dhurwaagii u geysana weydey. Sirteedii xeesha dheerayd bay goosatay inay wax ku qaybsato illaa hadday isu tagaan fara isla gefi mayaane, waxayna si aad ah uga baqaysey dhurwaayo ay isaga qaraabo ahaayeen inay dilaan ama xiraan.

Ariga dabadiisii oo dhan bay soo urursatay, oo foodda dhulka ugu wada xabaashay. Markaasay qaylo afka ku shubatay iyadoo leh; "Waa wareey waa wareey, arigii waa dhulcunayey arigii waa dhulcunayey !"

Dhawaaqii dawacada ayaa waxaa soo raacay dhurwaagii indhaha la'aa iyo kuwo kale, oo iyana qaylada darteed godadkoodii ka soo fadadey. Markay u yimaadeen bay weydiiyeen waxay la qaylinayso, oo harka galay la soo dersey. Markaasayte; "Arigaan la joogey dhulkaa wada liqay oo waa kuwaas dabooyinkiisii ka soo jeedaan".
Dhurwaayadii waxay damceen inay ariga dhulka ka soo jiidjiidaan, oo wax uun ka caymiyaan. Mid waliba intuu dabo ilkaha ku qabsaday ayuu kor ula boodey, mise waa dabo qur ah. Goortaasay la noqotay inuu dhulku arigii cunay, dabadana nacay ama iskaba hambeeyey. Dabadeed, halkaasay dhurwaayadii ochin la wada fariisteen iyagoo ka naxsan sida bahallo barkood u cayroobeen, ugu dambayntiina kii indhaha la'aa qarracan buu la dhintay.

## M A C N A Y N

**macaluul** : caato

**abti** : ninka hooyadaa la dhashay

**ebidey** : dhammaysay

**caymiyaan** : bixiyaan

**xeesha** : qoddada, tabta

1. **L a y l i**

**W e y d i i n o :**

1. Dawacada iyo dhurwaagu maxay isku darsadeen ?
2. Dhurwaagu muxuu dawacada kaga duwanaa ?
3. Labadooda keebaa qurux badnaa ? Maxaase ugu wacnaa ?
4. Ridii dambe sidee bay dhurwaaga ugu tirisay ?
5. Dawacadu maxay dabooyinka u urusan jirtey ?
6. Goortay dhurwaayadu arigii waayeen iyadii dambi ma u qabsadeen. ?
7. Dhurwaagii indhaha la'aa muxuu u dhintay ?

2. **erayadaan soo socda udhiggooda qor sida tan u horraysa.**

| | |
|---|---|
| dhul — cir | wan |
| maalin | qurux |
| riyo | macaluul |
| dabo | abti |
| orgi | dhimasho |

3. **Oraahaha hoos ku qoran weero geli.**

darsaday, heshiiyeen, sasabanaysa, ilaaliyo, dhexdiisa, taariikhdeedu, xereeyaan, xeesha, qaybsato, hambeeyey.

4. **Kobaha bambannaan erayada ku habboon ku qor.**

1. Arigu ......... iyo ......... wuu leeyahay.
2. Dhurwaagii indhaha la'aa waa........., kuwii kalana way .........
3. ......... dhurwaaga ka ......... badan.
4. Ariga hilibkiisii ......... wax kama ......... siin.
5. ......... dawacada ......... ka weynaa kana qacli yaraa.
6. Iyadu ......... cuntaba ......... meel ......... dhigi jirtey.

5. **Weerahaan hoose tii run ah horteeda RUN ku dhig, tii been ahna BEEN.**

b. Bahalku dad iyo duunyaba waa cunaa. ———

t. Dawacadu intay ariga dabooyinkiisii dhulka dhigdhigtay bay qaylisay. ———

j. Dhurwaayadu markay dawacada u yimaadeen dacwey u qabsadeen. ———

x. Dawacadu sirteedii way ku guuleysatey. ———

# WIIL IYO AABBIHI

Wiil iyo aabbihiis ayaa isku meel degganaa, mid walibana xaas iyo carruur naftiisa raalli geliyey buu lahaa. Odayga iyo wiilkiisu heshiis ma ahayn oo caqiidadey isku afgaran waayeen, dad sabool ahna way ahaayeen. Labadooda waxa isku diray waxaa u weyna caqiidada xagga diinta.

Odaygu Diinta Islaamka aad buu ugu dheeraa, oo weligiis salaadna ma qallayn berya soonna anfoco ma danayn. Wiilkuse soon iyo salaad midna ma daryeeli jirin, haddii ay ka geyn weydana bakhtiga kama sarriigan jirin. Maalin iyo habeemba odaygu wuxuu ka waanin jirey waxyaalahaas aan diintu oggolayn, oo sharafkiisa iyo caafimaadkiisaba u daran. Waxaase ayaandarri ahayd inaan wiilku waanada adoogi marna wax ku qaybsan jirin, uuna markasta ugu warcelin jirey: "Iimana sheegtid, kaamana yeelin".

Subixii dambe, ayaa odaygii ku yiri; "Maandhoow haddaadan salaadda iyo soonka midna rabin, asaadan bakhtiga deyneyn iga guur". Isla subixiiba wiilkii inta guurey buu meel cidla' ah oo aan jeesna lugu ogeyn degey, waxayse ku fiicnayd carro laga ugaarsan karo bay ahayd. Meeshu abaarba hayska ahaatee, kobo bambannaan iyo toomo isku dhafan bay u badnayd, carrasan ariga dhacarashadiisa ku habsanna way ahayd. Si uu arigu ugu dhaqaaloobo, balliyo maran oo geedo xay lihi ku badan yihiin buu xargo ku xirtay, kuwaasuu ugu tala galay inay gabanyarta ugaareed u soo gacan geshaan.

Wuxuu sidiisaas ku noolaadaba, isagoo goor galab ah laba jugley xargihii ka soo helay, oo hilbohoodii waxna shiilanaya waxa shillal halkaana u saaran yihiin ayaa odaygiiyoo ka soo wardoonayi la soo laabtay. Markay iswaraysteen buuye odaygii; "Waryaa ma bakhtigii baad shanta kula jirtaa?" "Maya aabbe ee halkaan fariiso arrintu sidaad mooddey ma ahee", wiilkii baa yiri.

Inkastoo wiilku uu yare madax adkaa, haddana xagga waalidka lagama mari jirin oo gacaltooyo qodda dheer ayuu aabbihi u hayey, wuxuuna siiyey hilbo baruur badan oo odaygu ka xiisa goyn waayey.
Markuu odaygii baahi beelay buuye: "Waryaahee i dhageyso haddaan tala hayaaye".

"Horta reerkaani waa deysid
Reerkii kalana waa soo rarid
Jugleyna waa doonis
Sur - dhabadleyna waa tuuris".

Odayga iyo wiilkiisii markaasay isu soo guureen iyagoo heshiis ah, isku meelna hawlaha adduunyada uga soo wada jeesteen. Maalintaas dabadeed, intuu duqii weesaystay oo foodda dhigay Allaahu akbar ma oran,, waxaana ugu wacnaa ugaarsiga badan oo uu ku hawshaysnaa.

Waa dambe ayaa niman ay aqoonni ahaayeen odaygii u yimadeen, oo ku yiraahdeen; "War awday salaaddii". Markaasuuye; "Adeerrayaal jugley hilib macaan iyo salaad weeysa badan laysku waa".
Dadkii ay isku degmada ahaayeen iyo nimankiiba waxay ogaadeen inuu odaygu la mid noqday ninkii sagaal iyo labaatanka casho soommanaa oo maalintii soddonaad bakhtiga ku afuray Maxaa yeelay, tii Ilaah oo aakhiro iyo addumba meel marin lahayd buu ka tegey.

**M A C N A Y N :**

**caqiidada** : diinta iyo rumaynteeda
**sabool** : cayr
**anfoco** : oon, (cunto ama wax la cabbo)
**jeesna** : qoysna
**dhacarashadiisa** : daaqsin-abaaraadkiisa.

**Dhacar** : naqa ka soo baxa meel roob mar hore ku da'ay, oo inta si fiican loo degey laga guurey isagoon rayskii hoose engegin.

| | | |
|---|---|---|
| xay | : | ubax |
| jugley | : | shimbir weyn |
| **sur-dhabadley** | : | ubbada weesada lagu qaato oo surka dheer |
| **dhabad** | : | shimbir sur dheer |
| awday | : | meeday |

1. **L a y l i**

W e y d i i n o:

1. Wiilka iyo aabbihiis maxaa isku diray? Maxaase u weynaa?
2. Haddii aad u sii fiirsatid keebaa gardarnaa?
3. Maxaa u darnaa wixii odaygu wiilka ka waanin jirey?
4. Meesha wiilku degey maxay ku fiicnayd? Maxayse ku xumayd?
5. Sidee wiilku arigiisa ku dhaqaaleeyey?
6. Meeshuu wiilku xargaha ku xirtay maxay ahayd?
7. Odaygu markuu hilbihii cunay muxuu yiri?
8. Muxuu odaygu salaadda isaga daayey?

2. **Erayadaan soo socda wadartooda dhig, sida tan u horraysa.**

| | |
|---|---|
| wiil — wiilal | cid |
| oday | qoys |
| xaas | hawl |
| jees | jugley |
| diin | ubbo |

3. **Hadalladaan soo socda sida ay meeriska ugu jiraan u macnee.**

| | |
|---|---|
| daryeeli jirin | isku dhafan |
| berya soonna | carrasan |
| ka geyn weydana | shanta kula jirtaa |
| sarriigan jirin | qodda dheer |

4. **Erayada hoose weero wanaagsan geli.**

| | |
|---|---|
| Islaam | carro |
| shiilanaya | ugaarsan |
| waanin | aqoonni |
| maandhoow | deysid |
| cidla' | hawshaysnaa |

5. **Kobaha banbannaan erayada ku habboon geli.**

1. Wiilku ......... wax kama ......... jirin.
2. Odaygu ......... san buu ......... ku waanin .........
3. Jugleydu ......... shimbir ......... .
4. ......... waa qalabka weesada ......... qaato .
5. ......... waa naqa qayb ......... mid ah.
6. Ubbooyinka ......... surka dhabaddoo ......... leeyihiin .

6. **Weerahaan hoose middii run ah horteeda RUN ku dhig, tii been ahna BEEN.**

b. Odayga iyo wiilka saboolnimadaa isku dirtay. ________

t. Diinta Islaamku bakhtiga ma oggola haddaan laga fursan waayin. ______

j. Wiilku aabbihiis aad buu ugu dheeraa. ______

x. Balliyadu waa meelo aan biyuhu fariisan oo geedo badan. ______

kh. Xarga xirashadu waa ugaarsiga tan ugu fiican. ______

d. Jugleydu laba lugood iyo baalal waaweyn bay leedahay.______

**Maahmaahyo :**

1. Ismaqalku dhaqaaluhuu ku jiraa.
2. Qawl waayeel ka dhacay waa qolof geed ka dhacday.
3. Ama afeef hore lahaw ama adkaysi dambe lahow.
4. Afkii ba'ay yiriba tubti wuu karaa.
5. Maan dad waa mudacyo caaraddood.


# WAXAAN WAX LA MID AH U BAAHNAYN
## ( m u r t i )

Haddii aad dabeecadda addunka iyo maqalka aakhiro labadaba u sii dhabbageshid, waxaad ogaaneysaa inay jiraan waxyaalo aan wax la mid ah u baahnayn oo badan. Waxaana weeye kuwaan hoos ku qoran iyo kuwa kaleba, oo haddaad isku daydo aad xusuusan kareysid.

**waxaa ka mid ah :**

1. Koow an labo u baahnayn.
2. Labo an saddex u baahnayn.
3. Saddex an afar u baahnayn.
4. Afar an shan u baahnayn.
5. Shan an lix u baahnayn.
6. Lix an toddoba u baahnayn.
7. Toddoba an siddeed u baahnayn.
8. Siddeed an sagaal u baahnayn.

1. Koow an labo u baahnay waa Eebbe.
2. Labo an saddex u baahnayn waa Maalinta iyo Habeenka.
3. Saddex an afar u baahnayn waa Qorraxda. Dayaaxa iyo Xiddigaha.
4. Afar an shan u baahnayn waa Afarta Jaho.
5. Shan an lix u baahnayn waa Shanta Tiirarka Islaamka. (Arkaanta Islaamka).
6. Lix an toddoba u baahnayn waa Lixda Iimaanka Islaamka.
7. Toddoba an siddeed u baahnayn waa Toddobada Ayaaamood.
8. Siddeed an sagaal u baahnayn waa Siddeedda Janno.



## GARDARRAA MA GUULEYSTO

Hal baa waxay ka dhexayeey: libaax, jilbis, dab, biyo lillaahi iyo laqdabo. Lixdooda midba wax buu hasha ka celin jirey oo hawshiisa ahayd, aad iyo aadna way u wada dhaqaalayn jireen oo keligeed baa ka dhacdey. Libaaxu wuxuu ku qaybsanaa inuu dugaagga ka ilaaliyo oo ayna agteeda imaan, jilbiskuna halaqa oo dhan. Dabka isagana hawshiisu waxay ahayd inaysan hashu doog iyo diraac toona dhaxamoon, biyuhuna inay harraad tiraan oo ayna hashu marna oon iska dareemin. Laqdabo wixii col ah oo ay aragto bay ku oran jirtey; "Hasha Boqor baa leh, haddaad u soo dhawaatiinna xarig baad mutaysateen", markaasaynan danayn jirin. Lillaahi caanahay inta ka listo lixdooda u qaybin jirtey iyadoon u kala badin, shilinta, gafanaha iyo takartana way ka guri jirtay.

Iyagoo sidaas heshiis ku ah, ayuu jiilaal yaab lihi dacay, markaasay hashii gurtay oo caana yeelan weydey, iyagiina aad u gaajoodeen oo waxay leefaan waayeen. Arrintii markay sidaas noqotay, ayay laqdabo waxay damacday inay keligeed hasha cunto shanta kalana isku disho iyadoon cidina sirteeda ogaan.

Maalintii dambe ayay laqdabo jilbiskii u timid, oo ku tiri: "Jibisoow libaaxa hasha kulama heshiin karnee markuu caawa seexdo lugta ka qaniin ha dhintee". Markaasuuye; "waa

hagaag, igu hano, waxaan kaa ballan qaaday inuu goor dhakhsale afka kala jiido". Goortii la seexday, saacadduna ay saddexdii fiidnimo tahay ayuu faysha dambe libaaxii goostay, markaas saan laba soo rogin, oo uu isla markiiba qur baxay. Labadii u heshiiyey mooyaane intii kalaa tiri: "Alleha u naxariisto jaalkayagii hasha dugaagga nooga celin jirey". Iyagoo u haysta inay tii Alla u timid.

Laqdabo haddana waxay u timid jiibiskii oo ku tiri: "War hooy jiibisoow roob baa soo socdee orodoo burkaas cawska ah jirso". Intuu isa sii daayey ayuu burkii hoosta ka galay, isagoo uga mahad celinaya digniintay siisay. Markaasay inta dab u tagtay ku tiri: "Daboow jilbis waa kan burkaas ku jiree ku gub aan inteenna kale hasha ku cidlaysannee". Isagiina taladii waa uu ka yeelay, oo kiiyoo warmooge ah burkii ku gubey.

Ayaantii dambe ayay laqdabo biyihii u timid, oo iyana ku tiri; "Biyoow jeer dab bakhtiyo gaajo ka bixi mayno idinkaana seexin kara, haddana waa kulul yahayoo lama heshiin karnee hawl ka qabta".
Biyo dabkiiyoo iska wahwahle bay ku soo rogmadeen oo raad tireen. Markay dabka sidaas u galayeen, biyuhu waxay islahaayeen hilbo badan baad hasha ka heli doontaan, oo kalsooni weyn bay isu hayeen.
Markaasay inta laqdabo u yimaadeen waxay ku yiraahdeen; "Soo belo ma ahin ninkii libaax diley haddaan annana dilley". "Allaylehe haah", bay ugu jawaabtey.

Laqdabo intaas kuma joogsannine lillaahidii iyo biyihii bay haddana isugu yeertay, iyadoo rabta inay labadoodana kala saabisho. "Waad arkaysaanoo Ilaah mahaddi innagaa hashii u harnaye, ismaqalkuna dhaqaaluhuu ku jiraaye biyoow togga horay u sii qaada, annana hashaan soo kaxaynaynaaye". iyadii baa ku tiri. Waa ay ku heshiiyeen taladeedii.
Goortay biyihii toggii ku dheceen bay iscelin waayeen, hashiina indhihii bay u lahaayeen aragti dambana bal daa. Labadii kale hashii baa lugu soo haray, sayte laqdabo iyadoo damacsan inay hasha dib ka juqayso si ay tan kale ugu baabbacayso: "Lillaahiyeey hasha garqaad gadaal baan ka soo eryayaaye". Markay lillaahidii hoggaankii midigta ku dhigtay bay hashii dib ka juqaysay, markaasay inta haraati isla kala jiiddey laqdabada nafteedii beerka goysey. Halkaasayna laqdabo ku ruux baxday, lillaahina hashii u hartay.

**M A C N A Y N**

**jilbis** : halaq madoow oo qaniinyadiisa aalaaba loo dhinto.

**laqdabo** : s i r

**lillaahi** : sir la'aan

**dareemin** : garan

**o o n** : harraad

**shilinta** : bahal yar oo guduudan oo fara leh, dhiig ku noolna ah.

**gafanaha** : shilin weyn oo cad

**takartana**: bahal yaryar oo baalal leh dhiig ku noolna ah

**faysha** : boqonta

**saabisho** : s i r t o

**1.** **L a y l i**

**W e y d i i n o :**

1. Sheekadaani intee waxyaalood bay ku saabsan tahay?
2. Ma kala sheegi kartaa wixii wax lahaa iyo wixii la lahaa?
3. Lixda waxyaalood oo hashu ka dhexaysey yaa u darnaa?
4. Biyuhu markay togga qaadeen ma soo noqdeen?
5. Laqdabo muraadkii ay lahayd ma u suurtoobey?
6. Hashii yaa u haray? Maxaase ku wacnaa?

**2.** **Sheekadaan dhexdeeda waxaad ka soo saartaa magacyada lab iyo kuwa dheddig oo ku jira, mid walbana weer geli.**

**3.** **Waxaad dhigtaa shan siyood oo ay halaqa iyo dugaaggu ku kala duwan yihiin.**

**4.** **Kobaha bambannaan oraahaha ku aaddan geli.**

1. Hal baa ......... ka dhexaysey ......... waxyaalood.
2. Dugaagga ......... ka ......... jirey libaaxa.
3. Laqdabo ......... been bay u ......... jirtey.
4. ......... waa shilin .........
5. Takartu ......... bay ......... ku duushaa.
6. ......... qaniinyadiisa ......... waa loo .........

5. **Weeraha hoose tii run ah horteeda RUN ku dhig, tii been ahna BEEN.**

b. Halaqu caga uu ku socdo ma leh. ———

t. Jilbiskii wuxuu damcay inuu keligi hasha u haro. ———

j. Libaaxii kobtii lagu qaniiney buu ku dhintay. ———

x. Lillaahidii biyey waxay ku tiri dabka seexiya. ———

kh. Hashii haraati bay laqdabo lug miraha kaga dhitay. ———

d. Kulligood lilaahi iyo hashii baa ka haray. ———

# D I I N

Waxaa la sheegay, in waagii hore diinku hilib cayriin oo muruxsan uu ahaa. Waagaas diinku sidaas ahaa, maalintii markii qorraxdu kulushahayna geed hoosti buu geli jirey, qabawga habeenkiiyana waa socon jirey. Aalaa caadadiisu waxay ahayd inuusan ciyin si aan bahalladu u soo raacin, illaa waa hilib kabxa yaale, iyo isagoo labada qaboono daaqa.

Nafleyda duusha oo aan shimbiruhu ku jirin, mageceedana haad la yiraahdo, iyo cayayaan tira badan ayaa waxay ku tashadeen inay berri labada saac diinka cunaan. Meeshaas ay ku kala ra'yi qaadanayeen waxaa geel la joogey laba nin oo la kala yiraahdo Samatalis iyo Warsame. Labadoodu waxa haadda iyo cayayaanku ku hadlayeen way maqlayeen, aad iyo aad beyna uga xumaadeen dhimashada diin oo berri subax lugu tashoon yahay.

Markaas dabadeed, ayaa Samatalis arrin u soo jeedi yey Warsame, taasoo ku saabsanayd siday diin naftiisa ku nabadgelin lahaayeen. Labadoodii waxay isku afgarteen in Warsame diin wargeliyo intaan muddada la gaarin, si uu uga gaashaanto cadawga foodda ku soo haya.
Warsame sana ka hor ayuu Shiikh wuxuu ka maqlay, in qofkii naf go'aysa nabadgeliyaa ay kaalin weyn u tahay adduunkiisa iyo aakhiradiisaba.

Diinkii oo gal xareed ah ka fulaya ayaa Warsame u yimid, oo yeen, "War Diin nabad ma sheegtay?" Suuye diinkii; "Dareen ma ogiye adigu maxaad sheegtay?" "Anigu waxaan sheegay in berri siddeedda subaxnimo haad iyo cayayaan badani ay ku tashoon yihiin inay ku cunaan", Warsamaa yiri. "Meesha ay ku kala war qaadanayeen soo Ilaahay ma joogin?", diinkii baa weydiiyey. "Haah", baa Warsame yiri. Markaasaa Diinkii wuxuu yiri; Jaalle waad mahadsan tahaye dan uga bax, sir ma qabe Allow sahan maqane". "Haddii aan mar kuu soo digey xoolihii dayacnaa baan ku noqonayaaye nabad iyo warsan", ayaa Warsame hadalkiisii ku dhammeeyey.

Goortay qorraxdu soo baxday baa xag Eebbe qolof adag diinkii looga gambiyey, oo hilibkiisii qarsoomay. Haaddii iyo cayayaankii meeshay diin ku ogaayeen bay soo aadeen, iyagoo damacsan inay raqdiisa kobta dhigaan. Isagoo iska daaqaya, oo aan wax dhiilla ahi ku jirin ayay afarta

gees ka soo galeen oo ku soo qamaameen, [illegible] aa ku gamaamadan kii qaniin isyiraahdaba afkaa qalloocda, markaasay waxay soo xusuusteen maahmaahdii ahayd "Wax badso wax beel bay leedahay" Maxaa yeelay, meeshay hilib ka cuni lahaayeen afbeel bay ka qaadeen

M A C N A Y N

aalaa : ugu badnaan

kabxa : bannaan

qaboono : arrorta hore iyo gabbal gaabka

cayayaan : nafleyda aan lafaha lahayn.

kaalin : waxtar

fulaya : wabax-tegahaya

dayacnaa : baylahnaa

raqdiisa : meydkiisa

dhiilla ahi ; collayta ahi

qamaameen : yaaceen

gamaamadan: gadfan

1 L a y l i

W e y d i i n o :

1. Maxaa diinku labada qaboono u daaqi jirey?
2. Waagii diinku muruxsanaa muxuu u aammusi jirey?
3. Yaa ku tashaday inay diin calfadaan? Yaase maqlayey?
4. Labada nin maxay meesha u joogeen? Maxayse isku afgarteen?
5. Yaa sana ka hor Shiikh wax ka maqlay?
6. Goortuu Warsame diinka u tegey xaggee buu joogey?
7. Diinku ma baqay markii loo war keenay? Muxuuse ku warceliyey?
8. Ilaahay sidee diinkii u galay?
9. Haaddii iyo cayayaankii muraadkoodii ma heleen?
10. Markii diinkii laga kala tegey qoloftii ma ka fuqday?

2. **Toban cayayaan iyo shan haad magacyadood dhig.**

3. **Toban sadar oo aad diinka kaga sheekeyneysid qor.**

4. **Meelaha bambannaan erayada ku habboon geli.**

1. Diinku ......... hore waa .........
2. Haadda iyo ......... waxay ku ......... inay diinka .........
3. Meesha ay ......... tashanayeeyn rag baa ......... la .........
4. Shiikh buu wuxuu ......... maqlay in qofkii ......... nabad gediyaa ay ......... u tahay.
5. Diinkii ......... gol xareed ah ka ......... ayaa ......... u yimid
6. Xoolihii ......... ka soo ......... waa .........
7. ......... ma qabe ......... sahan .........
8. Goortii qorraxdu soo ......... ayaa ......... diin qolof ku .........
9. Isagoon ......... ku jirin bay ......... iyo .........ku soo bexeen.
10. Allaaba waa ......... ay ka cunaane.........baa badankood .........

5. **Weerahaan soo socda tii run ah horteeda RUN ku dhig, tii been ahna BEEN.**

b. Haaddu waa inta baalasha leh oo dhan. ———

t. Shimbiruhu hilibka ma cunaan. ———

j. Cayayaanku baalal ma wada leh. ———

x. Samatalis iyo Warsame mid baa waallaa. ———

kh. Diinkii oo daaqahaya ayaa Warsame u yimid. ———

d. Ebbe Diinkii wuu xannaaneeyey. ———

r. Qorraxdu markay soo baxday ayaa diinkii laysugu yimid.—

s. Diinkii markuu waxa soo yaacaya arkay buu baqay. ———

sh. Haadda iyo cayayaanku diinkii waa daldallooliyeen. ———

dh. Diinkii sidii dhiig uga da'ayey buu waa dambe dhintay.——

# H A L X I R A A L E

## (googaaleysi)

Halxiraaluhu waa waxa laysku xirtoo dhan, ama googaaleysi ha ahaado, ama gabay ha ahaado, amase si kaleeto ha laysu xirtee. Dadka halxiraalaha yaqaannaa oo maskaxdooda ka curiyaa waxa ay sheegayaan oo dulucdoodu tahay waa inay wax run ah noqdaan, oo xujadooda ku qumman.

Halxiraalayaashaan soo socda ka jawaab sida saddexda googaale oo u horraysa, adigoon eegin bogga jawaabahoodu ku qoran yihiin **(B. 98)**.

**Googaaleysi :**

1. Wax so' leh **(hilib leh)**, oo sar leh, oo suun leh, oo seeda leh, oo sanuun leh, oo aan nin sooryo ku deeqin.

   **(Mijinta ariga.)**.

2. Injir mara siddeeda qabta, oo mara sagaala huwan, oo wiyil daadihineysa, oo maroodi dhegta haysa, oo riyo daad ka eryeysa. **(Beenta)**.

3. Xagga bari tegey, xagga bugux tegey, meelan joogaba Jaah wanaagsane way hor joogaa. **(Ebbe)**.

4. Mas barko oo maroodi kugu qooqaarsey.

5. Ul qurux badan qaadan waa.

6. Saddex nin oo nin waalan sidda'.

7. Isgaduudis, isgaroobis an la guursan.

8. Habar belo ah, riyo boqol ah, haruub buqul ah.

9. Halmadow hawd miratay.

10. Hashaan dabada hayaa duuddii leeftay.

11. Abtigay shansha gaab shir ka dhawaaq.

12. Lay boodbooti lay baalbaali, haddii layga bogo bawd laygu tuur.

13. Afar gamuun god ku wada yoontay.

14. Abtigay warma dheere webi taraar.

15. Arigayaga xeradiisu waa wada ul oo ul la qaado ma leh.

# BAHALLO IYO GOROYO

Waa baa waxaa hali ka dhexaysey bahallo iyo qoroyo. Hasha waxay qayb uga heleen xoolo bahallo mag looga siiyey Kadabshiir nin dhagax ku dhuftay isagoo mus ka sii dusahaya. Bahalladu waxay kala ahaayeen: Libaax, Dhurwaa, Shabeel, Weer, Dawoco, Dabaggaalle, Soongur, Quraanyo iyo Jirac.

Habeenkii dambe, ayay kuwii kale dawoco iyo goroyo waxay ku yiraahdeen; "Waa seexanaynaaye hasha inoo qala". Markaasay labadoodii inta hashii qaleen, bab oog ah hilbeheedii ku halaamacoodiyeen. Intayna wada bislaan baa goroyadii hurdo la dhacday, oo hawshay haysey hilmaanty. Goortay dawoco aragtay inay keligeed soo jeeddo, bay hilbihii hasha bawdo ma ahee intii kale cuntay, goroyana afka dufan u marisay. Waxay kaloo yeehay si ay goroyo ku masabidato, intay huruddey bay bawdadii ay reebtay baalka u gelisey oo iyana dug tiri.

Goor in door ah la jiifey, ayay wada baraarugeen. Markaasay waxay yiraahdeen; "Naayaaya Goroyo iyo Dawoco gaajaa na haysee maad wax noo dhiibtaan?" Sayte goroyadii "Anigu dawacaan ku ogaaye hala warsado". "Hilbihii gorayaa cuntay, oo waa kaas afkeedu dufanka leeyahay", dawacadii baa hadalkaas tiri. Bahalladii inta warkii dawoco run moodeen bay goroyo hilbihii keen yiraadeen, haddii kale adaan ku cunaynaa. Sayteen goroyadii' "Alloow dhulku ila go'o oo cirku igu soo dumo, baalashuna iga carareen inaan cunin".

Markii hilbihii wax cunay la aqoon waayey ayaa dhurwaa faal dhigay, oo wuxuu yiri; "Dhageysta ! Dab oog ah inoo shida oo aan kulligeen ka wada boodno, qofkii hilbihii cunay isagaa ku dhici doonee". Dab badan oo ay qoryo miibac ah saareen bay shiteen, oo midba markiisa ka soo bood la yiri.

Libaax baa soo orday, oo inta ka boodey yiri;

"Qaalma soogsoogan  
Oo seeri daaqahaya  
Sararta uga dhacoow ani dheh".

Dhurwaa baa ka booday, ooye;

"Reer nabad ku soo galay  
Kaga salaliyoow ani dheh".

Weer baa booddo wacan isna muujey, ooye;

"Reer laba ku lulan jiray
Mid u haawiyoow ani dheh".

Shabeel baa isna ka boodey oo yiri;

"Riya xagaa, oo xagar daaqay
Oo xamxammaa daaqay
Xayrtooda babbiyoow ani dheh".

Dawacaa iyadoo ka baqaysa inay ku dhex dhacdo waxay tiri, iga sii jeesta dabadaan dhaleeco ku leeyahaye. Markaasay inta gees ka martay siday ka booddey tiri;

"Baraarkii reer abtigay
Oo berrin daaqahaya
Buurbuuratooy ani dheh".

Dabaggallaa toogadiisii inta ka boodey yiri;

"Afar hal oo quulla ah
Qooraha ku laabtoow ani dheh".

Soongur baa iyana cirkaas ka martay, oote;

"Aslaneey udub-dhexaadeey
Islaanka gabadhiisooy ani dheh".

Quraanjaa iyana si habsamiya uga booddey, goortaasayte;

"Xayr naagi meel dhigatay
Ka xagxagatooy ani dheh"..

Jirac baa inta wax yar dib u baxay iska tolay, ooye;

"Fiqi meel fadhiya
Futada ka qandhuuftoow ani dheh".

Goroyaa tiri bal adna wax iska day, intay ordeysey ayaa bawdadi ka soo dhacday dabkiina dhexda u fariisatay.

Siduu ballankoodu ahaaba goroyadii halkaasaa lugu qashay.

**M A C N A Y N**

| | | |
|---|---|---|
| **bawdo** | : | lafta shanshada ka korraysa |
| **baraarugeen** | : | tooseen |
| **faal** | : | curraafsi |
| **soogsoogaa** | : | taagtaagan |
| **salaliyoow** | : | qaylisiiyoow, nixiyoow |
| **dhaleeco** | : | jaad cudurrada ariga ku dhaca ka mid ah. |
| **quulle** | : | jeerinka mirihiisa |
| **fiqi** | : | shiish, wadaad |
| **halaamacoodiyeen** | : | ololka korkiisa ku bisleeyeen. |

**1. L a y l i**

**Weydiino:**

1. Bahallada iyo goroyadu maxay isugu yimaadeen ?
2. Yaa hilbihii cunay ? Yaase afka dufan ku lahaa ?
3. Dhurwaagii faalka dhigay run ma sheegay ?
4. Kulligood dabkii ma ka wada boodeen ? Caddee jawaabtaada.
5. Goroyadu markay orodday maxaa ka soo dhacay ?
6. Qaalmo soogsoogan oo seeri daaqahaya sararta uga dhacoow ani dheh macneheedu waa maxay ?

**2. Erayadaan hoos ku qoran weero geli.**

| | |
|---|---|
| bahallo | qandhuufo |
| karsan | udub-dhexaad |
| ma ahee | salaley |
| gaajo | oog |
| soogsoogan | miibac |

3. **Sheekada dhexdeeda shan magac oo lab iyo shan magac oo dheddig ka soo saar.**

4. **Meelaha bambannaan oraahaha ku habboon geli.**

1. Goroyadu waa ……… weyn.
2. ……… waa lafta shanshada ka ………
3. ……… dabaday dhaleeco ……… lahayd.
4. Dhurwaa ……… faal ……… ah dhigay.
5. Dawoco ……… gees bay ka ……… .
6. ……… udub-dhexaadeey Islaanka ……… ani dheh.
7. ……… goroyada ka soo ……… .

5 **Weerahaan soo socda tii run ah horteeda RUN ku dhig, tii been ahna BEEN.**

b. Goroyadu sur gaaban bay leedahay. ———

t. Libaaxu hal geel ah buu wax yar ka gaaban yahay. ———

j. Jirucu lafo yayar buu leeyahay. ———

x. Quraanyadu dhego fiiqfiiqan bay leedahay, lafase ma leh. ———

kh. Soongurtu waa gaaban tahay oo guduudan tahay. ———

d. Dabaggaalluhu faa'iiduu leeyahay. ———

r. Dawacadu bahallada kale ka sir badan. ———

s. Soongurtu wax bay sixirtaa. ———

# G A B A Y

## (Cali Xuseen)

Cali waa ina Xuseen Xirsi, wuxuuna ku dhashay magaalada Burco 1913. Cali Xuseen aabbihi kuma garaadsan, hooyadina isagoo shan jira bay dhimatay. Taniyo toban iyo afar jirkiisii Cali, waxaa soo koriyey eheladiisii, gaar ahaanna ina habreedki.
Gabayga wuxuu bilaabay markuu siddeed iyo toban jirsadey, wuxuuse gabaygiisu xoogaabey soddoniyo laba jirkiisii. Sida la ogsoon yahay sannadku markuu ahaa 1945, waa waagii dhaqdhaqaaqa gobannimaddoonka Soomaalidu uu aad u sarakacay.

Cali haddii uusan u sidan, wuxuu ka mid yahay ragga gabaya, oo nool, oo Soomaaliyeed kuwa u badsha. Gabayadiisuna waxay u badan yihiin ama wada yihiin kuwo ficil Soomaaliyeed saamaynaya, guubaabo iyo dal jecli dhab ah. Wax badan ayuu siyaasadda gudaha iyo tan dibadda ka gabyey, welina waa gabyaa oo kama daalin.

Gabaygaan soo socda Cali wuxuu tiriyey 1954kii, iyadoon Amxaaro Hawd gacanta ku dhigin, lagase ballan qaaday. Ciil iyo caro awgood, wuxuu gabayga ku tilmaamay inuu lix waxyaalood la mid yahay, wuxuuna Ummadda Soomaaliyeed tusaala ka siiyey inay gunnimo weyn tahay iyagoo gorodda rogta oon qarannimadooda u sarakicin.
Lixduu iska dhigay inuu la mid yahay:

b) Oday gablan ah oo habeensaday.

t) Naag gaari ah oo ninkay jeclayd ka dhintay, mid ayna raalli ka ahayna lugu dirqinayo.

j) Geel harraad la golongolay oo ninkii iyo nirgihiisiiba gabay.

x) Libaax inta gantaali wareentay aad u xanuunsaday, oo aan arkayn wixii ganay.

kh) Nin aan garab lahayn oo shisheeye gar eexo ku naqay. Iyo

d) Naakhuude doon cammirani badweynta kaga jabtay asayan weli degin, oo waxa haysta ka murugeysan.

Wuxuu gabaygii ku yiri:

Gabaygaan rakibay iyo dhulkaan xalay garaacaayey
Gurxanka iyo reenkaad libaax go'aya moodeysey
Gam'i waayey Soomaaliyeey gocoshadiinniiye

1. Sida oday gablamayaan wuxuu dhalay gargaareynin
Oo fiid garkiyo labada law meel isugu geeyey
Gam'i waayey Soomaaliyeey gocoshadiinniiye


2. Sida gaari kii qabey dhintoo galab la sii qaaday
Oo gorodda loo suray midaan gabadhu dooneynin
Oo geeridiisii ilmada gabax ka siinaysa
Gam'i waayey Soomaaliyeey gocoshadiinniiye

3. Sida geel harraadoo mudkii geri ka dhuubnaaday
Oo goray ninkii maali jirey godol ka soo waayey
Oo golongol waa lugu hubaaye gabanta diidaaya
Gam'i waayey Soomaaliyeey gocoshadiinniiye

4. Sida aar gamuun lagu dhuftoo gubayo waabaygu
Aan geesta ka arkayn wixii nabarka gaarsiiyey
Oo meel gawaana u boxoo miciyihii giijey
Gam'i waayey Soomaaliyeey gocoshadiinniiye.

5. Sida geed nimaan garab lahayn lagu gurraynaayo
Oo waxan gartiisii ahayn guudka laga saaray
Oo ciil la goodaadsadoo gorodda laalaadshey
Gam'i waayey Soomaaliyeey gocoshadiinniiye

6. Sida doonni maal lugu guroo gurada loo buuxshey
Oo ay shukaantii geb tiri gabalna naafoobey
Oo geesigii wadey hammiyey guuldarrada haysa
Gam'i waayey Soomaaliyeey gocoshadiinniiye
Afartaa guntaye tala waxaan idin ku gowdiidshey
Goldaloolladiinnaan arkaa garanna maysaane
Waxay nala gudboon maanta waad garab maraysaane
Gurigaaga aad leedehee gogoshu kuu taallo
Gawaha adoo uga baxaa waa gunnimo weyne
Godkii nagu daboollaan jiree nala ku gaadaayey
Garaad yeelannoo Eebbahay goofki naga saarye
U guntada xornimadii haddaad gacan ku haysaane
Gaadiidku heeryada mar buu gudub u tuuraaye
Nin guhaad qabaa maalin buu dabarka gooyaaye
Biciidkuba ka soo guluf dameer geesa loo xiraye
Geeddiga miyaydaan arkayn la isu soo guurye.



# D A D Q A L

Meel cidla' ah oo aan dad lagu arag, yaa waxaa ku yaalley qurac dheer oo daruuraha u dhow. Quraca korkiisa waxaa degganaa nin dadqal ah iyo afar curruur ah, oo isagu dhalay oo labana gabdho tahay labana wiilal.
Carruurtu maalintiina quraca hooskiisey harsan jirtey, habeenkiina korkiisey ku hoyan jirtey. Dadqalku inta aroortii jarmaado ayuu dad ay cunaan dooni jirey, taasina waxay dhaxal siisay inayna hilibka dadka ma ahee oon kale u hunguriyoon.

Maalintii dambe ayaa dadqalkii soo jarmaaday, oo dad ay cunaan raadcadood galay. Goortay qorraxdu baalka dhigatay buu gabar ari la joogta u yimid. Markaasuu ku yiri' "Ina adeer maxaad sheegtay ? "War dhafoor buu ku yaal, wax soo aaddan Allaa og, wax weydiin ogaal, waa sida e adigu maxaad sheegtay ?", gabadhii baa ugu warcelisey. Suuyeen, "Walaal wax adreen ah ma ogiye ma isguursaneynaa ?" Sayteen iyadii, "Adigay talo kula gudboon tahay", wada hadalkoodiina inay israacaan buu ku dhammaaday.

Dadqalku markuu dadka u imaanahayo aalaa dhar wanaagsan buu soo xiran jirey, sidaa daraaddeedayna gabadhu u raacday oo nin wanaagsan oo xila-doon ah u mooddey.
Waxay socdaan iyo waxay socdaamba, quricii dheeraa hoostiisii

bay yimaadeen. Carrurtii dadqalku dhalay, oo calaacalo dad sidata ayaa geedkii ka soo degtey markay naagta aabbohood wado arkeen. Markaasay waxay ogaatey in ninku dadqal yahay, iyaduna ay maanta shillalka saaran tahay. Dadqalkii baa gabadhii wuxuu ku yiri: "Walaal ma run mise been, runi waa tan hadda joogta, beenina waa tii hore."
"Waa hagaage biyo aad igu karsataan doon", bay tiri. Markaasuu inta gabadhii garbadduub geedkii ugu xiray biyo raadshey.

Intuu sii maqnaa bay carruurtii sasabatay, oo ku tiri: "Waryaaya soo gaajo idin ma hayso?" Say "Haah" bay yiraahdeen. Markaasayte, "Dab badan shida aad igu dubatiine".
Carruurtii dab yaab leh bay shideen, qoryo waaweyna waa saareen markaasaa ololkii cirka qabsaday. Sayte haddana; "Xargaha iga fura aan dabka galee, markaan bislaadana hilbahayga aad cuntaane". Run bay inta moodeen xargihii ka fureen. Say jeegaday inta afartoodiiba ku wada dhegtey dabkii ku riddey, oo ciddoodii u carartay.

Dadqalkii casar dheer buu biyuhuu gabadha ku karsan lahaa keenay. Suu wuxuu arkay afartiisii carruurta ahayd oo dabkii ku bislaaday iyo iyadiiyoo maqan. Markaasuu gaajadii haysey darteed carruurtiisii cunid ugu dhaqaaqay, oo yiri; "Waa dhallaankaagii oo dhiillo saan u gashaye iska dhunkuluuluxso.

Gabadhii iyadoo nabad qabta ayay gurigoodii tagtay, ninkii mar dambe ma i guursaneysaa yiraahdana waxay ugu warcelisaa waalidkey iga doon.

**M A C N A Y N**

| | | |
|---|---|---|
| **jarmaaday** | : | qaboona kacay |
| **talo** | : | arrin |
| **oon kale** | : | cunto kale |
| **xila-doon** | : | naaga-doon, guur-doon |

**1.** **L a y l i**

**W e y d i i n o :**

1. Dadqalka iyo carruurtiisu xaggee ku hoyan jireen?
2. Dadqalku markuu dad doonahayo muxuu qaadan jirey?
3. Gabadhu markay isaga raacday maxay moodeysey?

4. Carruurtu markay gabadha arkeen maxay la soo degeen ?
5. Dadqalku markuu biyaha doonay gabadhu sidee ahayd ?
6. Dabkii yaa shiday ? Yaase wax ku ridey ?
7. Gabadhu ma caqli badnayd mise way iska roonayd ?
8. Markay carruurtu gubatey yaa meeshii ka tegey ?
9. Dadqalku markuu biyaha keenay muxuu arkay ? Muxuuse falay ?
10. Yaa markii dambe arrintu la xumaatay ?

**2. Sheekada dhexdeeda shan magac iyo saddex tilmaamood ka soo saar.**

**3. Shan sadar ama ka badan oo aad dadqalka kagâ sheekeyneysid qor.**

**4. Meelaha bambannaan erayada ku habboon geli:**

1. Qurucu aad ......... u ......... yahay.
2. Carruurtu ......... korkiisey ku hoyan .........
3. ......... dad isaga ......... carruurtiisu cunaan buu ......... jirey.
4. Dadqalku gabadha ......... ku yiri, "Ina ......... maxaad .........
5. ......... nin wanaagsan ......... xila-doon ah bay ......... .
6. ......... gabadhu tiri war dhafoor ......... ku .........
7. .........markay gabadha.........calaacalo ......... bay la soo.........
8. ......... inta gabadhii ......... u xiray buu ......... doonay.
9. Carruurtu ......... bay ......... .
10. Gabadhii ......... bay nabad ......... tagtay.

**5. Weerahaan hoos ku qoran tii run ah horteeda RUN ku dhig, tii been ahna BEEN.**

b. Qurucu laamuu leeyahay. ———

t. Carruurta dadqalku shan bay ahayd. ———

j. Carruurtu maalin iyo habeemba geedka korkiisey seexan jirtey. ———

x. Gabadha markii ninku u yimid geel bay la joogtey. ———

kh. Markay gabadha iyo dadqalku yimaadeen waa seexseexdeen. ———

d. Ilmuhu markay soo degeen calaacalo dad bay siteen. ———

r. Dadqalku inta gabadhii oo taagan ka tegey buu biyo keenay. ———

s. Dad baa maalintii dab ku gubtey. ———

sh. Dadqalku markuu biyihii keenay hilbuu cunay. ———

dh. Gabadhu jidkey bahal ku aragtay. ———

# ABWAANNIMO

Waagii hore, dadku waxay iskula hadli jireen hadallo dellagan, oo sida loo yiri iyo sida ulajeeddadoodu tahay ayna isku mid ahayn. Fartiimaha iyo dhambaallada ay isku wargelin jireenna, aalaa wararka sidaas ah ayay isku weydaarsan jireen. Waxaa suuragal ahaan jirtey, in laba qof oo iswaraysanaya aadan waxba ka garan. Taasna waxaa ku wacnaa abwaannimadii dadkii hore ku duugneyd.

Waxaa dhacday, in wiil aabbihi la heshiin waayey oo ay maamulka reerka iyo hawsha adduunyoo ka dhexaysey isku jiireen, iyadoo ay ku wacnayd odaygoo nin kulul oo aan loo adkaysan karin ahaa.
Ayaan dambe, ayuu odaygii inta wiilkii jiscin siiyey wuxuu ku yiri; "Maandhoow haddaad ila heshiin weydey iga tag". Markaasuu wiilkii meeshii odaygu joogey isaga dhoofay, oo tii magaalo ugu sokeysey iska degey. Saadkii aabbihi soo siiyey wax yar buu magaalada kala soo galay, laba toddobaad dabadeedna waa ka dhammaaday.

Wiilku inkastuu fara marnaa oo uu habeenno baahi ku seexan jirey, haddana oogadiisa iyo dharkiisa toona wasakh uma oggolayn. Goortii uu ka boqo inay dhallinta asaaggiisihi dharka dhiqiddiisa maalintooyo wax kaga sheegaan, marka la seexseexdo buu ku habeembar kici jirey. Maxaa yeelay, wuxuu xusuusnaa maahmaahda la yiraahdo "Arrad waa dan uskagse waa doqonniimo".

Odaygii wuxuu maqlay inuu wiilkiisii aad iyo aad magaaladii ugu jiliesan yahay, wax gargaaraana aysan jirin. Markaasuu waa beer wax dhalaye safarro magaalada soo aadey fartiin ugu faray, oo ku soo yiri; "Jaallayaaloow wiilkeygii igu salaama, wuxuu yahayna ha iiga soo warramo". Nimankii safarrada watey markay magaaladii gaareen bay inankii farriintii u sheegeen. Goortaasuu ku yiri; "Waxaad ku tiraahdaan shanta salaadood isku weesaan ku tukadaa buu ku soo faray".
Nimanku waxa wiilku hadalkiisa ula jeedey ma aysan garan, oo waxay la noqotay inuu biyo uu ku weesaysto waayey, isaguse wuxuu lahaa maalintiiyoo dhan mar baan wax dhedhenshaa.

Markay safarradii soo laabteen ayaa odaygii loo sheegay hawraartii wiilkiisu ku soo yiri. Isla markiiba ulajeeddadiisii buu gartay, aad iyo aadna waa u calool xumaaday.

Maalintii dambe, ayaa safarradii oo magaaladii u kicitimaya odaygii wuxuu ugu sii dhiibey qumbe buuxa oo subag ah iyo soddon shilin, kuna yiri; "Waxaad ku tiraahdaan balliguna wuu buuxaa bishuna waa soddon buu aabbahaa ku soo yiri", isagoo ka tiiraanyaysan markii uu wiilkiisa iska ufeeyey.

Nimankii safarradu intay jidka ku soo jireen bay qumbihii subagga ahaa bar cuneen, oo soortay wateen ku iidaanteen, koow iyo taban shilinna lacagtii soddonka ahayd ka goosteen, iyagoo is leh wax garan doonaa ma jiraan.
Goortay magaaladii soo galeen bay wiilkii baaqigii siiyeen fartiintii aabbihi u soo farayna u tebiyeen.
Nimanku ula jeeddada middaanna ma ay garan, inankase abwaannimada aabbihiis oo kalaa ku duugneyd, oo isla markiiba wuu gartay in qumbuhu afka hayey lacagtuna ay soddon ahayd.

Intii ay u keeneen buu iska qaatay sidii nin aan waxba dareemin, markay ambabaxayeenna aabbihi ugu sii faray; "Waxaad ku dhahdaan wiilkaagii wuxuu ku soo yiri xaggayaga balligu waa kala bar, bishuna waa sagaal iyo toban".

Ninmankii safarradu farriintaan kalana waxay dulucdeedu tahay uma dhabbagelin, hunguri bayna ka qabeen inuu wax kale u soo dhiibo oo ay dabadeedna tooda qabsadaan.
Iyagoo iska dhigaya niman sama falay, oo ammaanadii loo dhiibey siday u ahayd u fuliyey ayay odaygii fartiintii u sheegeen. Markaasuu ogaadey inay nimanku tuug yihiin, oo subaggii iyo lacagtiiba musuqmaasuqeen. Dabadeedna, intuu dacwad codasha ah qortay ayaa isagiina xaqiisii la siiyey, iyagiina xabsiga loo taxaabay.

## M A C N A Y N

**dellagan** : sarbeeban, macna qarsoon.

**fartiin** : wax isu farid

**dhambaallada** : warqaadaha

**abwaannimo** : garasho weyn

**jiscin** : saad, sahay, jidmar

**uskagse** : wasakhse

**qumbe** : tebbad saddex qori oo isdhaafsan afka ku leh

**u tebiyeen** : u sheegeen, u gudbiyeen

**ufeeyey** : cayriyey

1. **L a y l i**

**W e y d i i n o :**

1. Dadkii hore waxay wax isku weydaarsan jireen maxaa ka mid ahaa ?
2. Odaygu jiscin fiican wiilka ma siiyey ?
3. Wiilku aabbihi ma ka raystay ?
4. Haddii odaygu markii hore inanka eryey muxuu ugu soo fartiin faray ?
5. Safarradu xaggee wiilka ugu yimaadeen ?
6. Odayga iyo wiilkiisa keebaa fartiimaha ku horreeyey ?
7. Maxay nimankii safarradu sameeyeen ?
8. Odaygu muxuu fartiintii dambe ka gartay ? Muxuuse falay ?
9. Sidee ugu dambayntii arrintii ku dhammaatay ?
10. Ammaano macneheedu waa maxay ? Sideese loo galaa ?

2. **Sheekadaan dhexdeeda toban magac ka soo saar. Mid walba weer geli, adigoon layliga hoose magacyada ku jira qaadan.**

3. **Oraahahaan soo socda wadartooda qor.**

| | |
|---|---|
| **aabbe** | war |
| **arrin** | wax |
| **doqon** | salaad |
| **jaalle** | balli |
| **salaan** | fartiin |

5. **Meelaha bambannaan erayada ku habboon ku qor.**

1. Dadkii.........badankood.........dellagan ......... ku hadli jireen.
2. Waxaa ......... ahaan jirtey hadday ......... inaadan .........
3. Ummaddii hore.........hadda joogta .........ka belo .........
4. ......... iyo ......... waa heshiin .........
5. Odaygu ......... buu wiilka .........

6. Inanku ......... uusan ......... ka aqoon buu .........
7. Laba ......... ayaa ......... uga ......... .
8. ......... wuxuu ......... in yarkii .........
9. ......... qumbe ......... iyo ......... ayaa ......... u soo dhiibey.
10. ......... ammaanadii ......... soo dhiibey ......... xadeen.

6. **Weerahaan soo socda tii run ah horteeda RUN ku dhig, tii been ahna BEEN.**

b. Dadkaanaa dadkii hore ka wax garadsan. ———

t. Wiilku isagaa aabbihi dan cad uga tegey. ———

j. Wiilku lacagtii loo keenay badankeed wuu ku khamaa- ray. ———

x. Magaalada dadkii degganaa wiilka waxba ma siin. ———

kh. Safarradu markii hore wax bay wiilka u keeneen. ———

d. Fartiimihii wiilku soo faray qof kastaa garan karey.———

r. Nimanka safarrada watey waa horaa lugu yiqiin inay wax xadaan. ———

s. Nimanku intay fartiintii odayga garteen bay ammaanadii qaar xadeen. ———

sh. Odaygu markuu arrintii ogaadey buu iyagii la diriray.———

dh. Sharcigu nimanna wuu xiray, ninna wuu raalli geliyey.———

## QOSOL IYO MAAD
### (afar nin iyo jamaaco)

Waxaa la yiri, waa baa waxaa isa soo raacay nin dhaga la', nin indha la', nin curyaan ah iyo nin qaawan.

Iyagoo meel cidla' ah maraya, yaa kii dhagaha la'aa wuxuu yiri; "Sac baa seeri ka ciyey".
Suuye kii indhaha la'aa; "Arkaayoo giiran.."
Curyaankii baa isna yiri; "An roornoo jabinno".
Markaasuuye kii qaawanaa; "Haddee ammaa nala furtaa ?"

♣
♣ ♣

Jamaaco masaajid ku tukaneysa, yaa iyagoo ragcaddii labaad u taagan mid safka dhexe ku jirey dhuuso ka fara baxsatay.
Intii u dhaweyd baa isku mar "uf, Alla ku doori" wada tiri.

Markaasuu inta masaajidkii kor u dhugtey wuxuu yiri; "Luguguma tukado maxaa Alla iga raacshay, irridda goortuu ka baxayeyna wuxuu sii lahaa; "futoy waysu naalaa!"

♣
♣ ♣

# A W B A A L L E

Tuulo yar oo aan dadku ku badnayn, ayaa waxaa degganaa wadaad magiciisa Awbaalle la yiraahdo, oo aan wixiisu ku fillayn. Tusbax afar boqol ah oo xabbaddiba hal ukun ah le'eg tahay, marka uu ku cibaadeysanayana sharqantiisa la maqlo, oo uu ku alla tuugo, iyo ul afka baalal goroyo ku leh buu sidan jirey. Wadaadka hurdadiisu aad bey u yarayd, oo baryada Eebbe ayuu ku soo jeedid badnaa.

Tuulada waxaa u dhaweyd magaalo nin Boqor ahi xukumo, oo rag wax sixraa ku badan yihiin. Dadka magaalada degganaa waxay aad uga dambeeyeen nimanka sixirroowyada ah, lacag badan oo ayna mutaysanna way ugu deeqi jireen.
Wadaadkii wuxuu maqlay inay magaaladaasi lacag leedahay, nimankaasina ay afka qabsadeen. Markaasuu inta tuuladii ka soo yohoomay magaaladii yimid, isgoo damacsan inuu lacagtaas wax ka helo.

Haweenkii magaaladu markay arkeen tusbixiisa yaabka leh, iyo ushiisa baalasha goroyo afka ku leh, ayay waxay moodeen inuu sixirroowyada aabbohood yahay. Markaasa tii aragtaaba lacag fara badan siisaa baqdin darla'.
Aqal yar oo uu seexdo buu dhistay, dhexdiisana wuxuu ka qotay god af ballaaran oo uu muufada ku dubto, halkaas ayayna haweenku ugu imaan jireen. Waxaa yaab lahayd, midduu Eebbe u baryaba muraadkeedaa u qumi jirey.

Maalin dambe, ayaa santuukh dahab ah aqal laga xaday, wixii qaadayna laga samray. Boqorkii baa dadkii magaalada oo dhan inta meel bannaan isugu keenay wuxuu yiri; "Intiinna sixirka taqaanoow gooni isugu baxa". Haweenkii baa waxay arkeen Awbaalle oo dhuundhuumanaya. Markaasay kashifeen, oo waxay yiraahdeen; "Boqorow aabbihii sixirroowyadu waa kan". Inta qadaadka la soo qabtay ayaa sixirroowyadii lagu dhex daray, amarna waxaa kulligood lagu siiyey inay wixii dahabka xaday soo saaraan .

Habeen walba marka la seexdo ayuu wadaadku inta tooso Ilaahiis wuxuu ka baryi jirey inuu wixii dahabka xaday haleelsiiyo. Markaasaa habeenkii dambe, nimankii tuugta ahaa oo saddex ahi waxay damceen inay Awbaalle aqalka ka xadaan. Goortay irridda ka soo istaageen, bay isagoo muufo dubanaya, oo tuu soo baxshaba tirinaya maqleen.

Markuu tii u horreysey "koow" yiri, tii ku xigtana "labo", tu kalana "saddex", bay moodeen inuu iyaga sheegayo oo sixir ku arkay. Markaasay inta nexeen u soo galeen, oo ku yiraahdeen; "Adeeroow dahabkii waan keeneynaaye hanna sheegin". Suuye, "Haddeer keena", inta iska dhigay sidii wax iyaga sheegayey.

Nimankii goortay dahabkii u keeneen ayuu isku kexeeyey oo Boqorkii u geeyey. Markaasaa Boqorkii aad u farxay, oo wadaadkii abaalgud siiyey isagoo u haysta inuu sixirroow yahay. Dadkii magaalada degganaa markay arrintii maqleen bay fajeceen, oo wadaadkii aqoonsadeen. Maalimba maalinta ka dambaysana, lacag badan baa soo geli jirtey siduu tuugtii u soo qabtayba.

Magaalada agteeda waxaa joogey maroodi dadka dila, oo wax u gala la waayey. Ayaantii dambaa Boqorkii sixirroowyadii haddana isugu yeeray, oo ku yiri; "Waxaan rabaa, in maroodiga meeshaas jooga la soo qabto oo magaalada la keeno, gaar ahaanna Awbaalloow haddaadan wax ka soo kaxayn ama adigu soo qaban beladka waad ka baxaysaa". Subaxaasaa wadaadkii talo ka sirqaday oo wuxuu arkay inay tijaabo uusan u tafaaful aqooni meesha timid.

Gabbalku markuu dhacay, ayaa wadaadkii alaabtiisii xambaartay oo gulguurasho magaaladii ugu baxay, si aan mar dambe loo arag. Isagoo guura ah, baa maroodigii arkay oo cayro dhabarka u saaray. Geed dheer oo Hareeri ah buu ka tiigsadey oo fiinta uga baxay, wadnihiisoo sidii koor carrabkeed feerihiisa u garaacaya baqdin awgeed. Maroodigii kama harine geedka hoostiisii buu soo istaagay, oo wuxuu damcay inuu geedka rujiyo. Intuu gilgilayey baa wadaadkii dushiisa ku soo dhacay, oo dhegaha qabsaday. Naxdin darteed, maroodigii wadaadkii oo ku dhabbacan ayuu daraadda habsadey, oo suu u ordayey magaaladii soo galay. Markaassa wadaadkii ka boodey oo yiri; "War maroodiga qabtooy, war waan keenaye arkooy".

Dadkii oo dhammi waxay moodeen in maroodiga wadaadku sixir ku soo kexeeyey, dabadeedna Boqortooyadii Magaaladey u doorteen, iyagoo u qaba wuxuu doono inay u suura galayaan.

**M A C N A Y N**

**qumi jirey** : aqbalmi jirey

**kashifeen** : sheegeen

qadaadka : jeegada
haleelsiiyo : la kulansiiyo
fajeceen : yaabeen
ka siriqday : ka xumaatay
rujiyo : fululiyo , kor u siibo

1. **L a y l i**

**W e y d i i n o :**

1. Magaalada ka hor, meeshuu wadaadku joogey maxay ahayd?
2. Muxuu wadaadku dadka kale kaga duwanaa ?
3. Magaaladu haddii ay tijaabo badnayd muxuu ka soo doonay?
4. Haweenkii magaaladu maxay wadaadka moodeen ? Maxaase ku wacnaa ?
5. Boqorku muxuu dadkii oo dhan isugu yeeray ?
6. Nimankii tuugta ahaa sidee wadaadku ku helay ?
7. Markii Boqorku amarka labaad baxshey muxuu wadaadku u dhuuntay ?
8. Geedka wadaadku fuulay maroodigu fiintiisa ma gaarey ?
9. Maroodigu markuu magaalada soo galay sidee wadaadkii yeeley ?
10. Dadkii beladku markii dambe maxay moodeen ? Maxayse yeeleen ?

2. **Hadallada hoos ku qoran dhammays tir, adigoo mar hore ka hadlaya, sida tan u horraysa.**

Anigu tuug **baan arkay.**

Adigu dad ......... .........

Wiilku lax ......... .........

Inantu hal ......... .........

Annagu aqal ......... .........

Innagu haan ......... .........

Idinku wax ......... .........

Nimanku geel ......... .........

**3. Hadalladaan soo socda weero geli.**

| | |
|---|---|
| Maroodi weyn | sixirroow jaban |
| tusbax dheer | Boqor wacan |
| baal goroyo | guri madoow |
| wadaad waalan | tuulo yar |
| muufo qaboow | magaalo qurxan |

**4. Erayada dhab u madow laaxinka ka saar.**

1. Wadaadku tusbax dheer buu **lahayd.**
2. Ushiisu afkay baalal ku **lahaa.**
3. Tuuladu magaalada way **ku** yar tahay.
4. **Hadduu** gaajo ku qabato risaaqad baa la doontaa.
5. Sixirroowyadu lacag **buu** heli jireen.
6. Aalaa **haweenka** lacag bay wadaaddada siiyaan.
7. Wadaadku **muufaa** god buu ku duban jirey.
8. Maroodigu aad buu u weyn **tahay.**
9. Awbaalle ducadiisu waa qumi **jirey.**
10. Magaaladu tuulada waa ka weyn **yahay.**

**5. Meelaha bambannaan erayada ku habboon ku qor.**

1. Wadaadku ......... tuulada joogey ......... kuma ......... .
2. Tuulada .........u dhaweyd ......... u ......... .
3. ......... waxaa ......... niman ......... ah.
4. ......... wadaadka ......... bay .........
5. Boqorku ......... isugu ......... sixirroowyadii ......... dhan.
6. ......... waxaa la ......... inuu ......... sixro.
7. Tusbaxa ......... xuwuu la mid ......... xabbad ......... ah.
8. Baqdini ......... ......... awga ......... ka .........
9. Geed ......... buu ......... ka .........
10. Intuu ......... ordayey ......... dheguhuu .........

6 **Weerahaan hoose tii run ah horteeda R ku qor, tii been ahna B.**

b. Wadaadku xaas iyo carruur buu magaalada ku lahaa.———

t. Tusbixiisu wuxuu ahaa afar boqol iyo in. ———

j. Awgu magaalada lacag buu u soo doontay. ———

x. Haweenku waxay moodeen inuu Awbaalle sixirroow yahay. ———

kh. Lacagtuu helay aqal qurxoon buu ka dhistay. ———

d. Niman afar ka yar bay tuugadu ahaayeen. ———

r. Awbaalle waxaa kashiftay gabar yar oo ag taagneyd. ———

s. Wadaadku karaamuu lahaaye sixirroow ma ahayn. ———

sh. Tuugtu markay ka baqeen in la helo ayay wadaadka u yimaadeen. ———

dh. Dadkii magaaladu waxay ogaadeen inaan awgu maroodiga soo kaxayn. ———

# D O Q O N
## ( m u r t i )

Doqoni waa ruuxii aan garan waxa ku toobboon oo marinkiisa ah, ayna geyinsiisey caqli darri iyo xil iska dhawr xad dhaafihi.
Doqontu waxay u kala baxdaa toban jaad :

b. Saddex waa isku bah

t. Saddexna waa isku bah

j. Saddexna waa isku bah

x. Midna waa bahgooni.

b. Duufley, Dareenley iyo Daabley waa isku bah.

t. Xididki-xante, Xaajaduu-watey-ka-xog-warran, iyo Xiluhuu-uureeyey-xoog-moode waa isku bah.

j. Surin-dheer-ka-dhaanshe, Soor-quureed-cune, Sixun-u-warran iyana waa isku bah.

x. Gar-ma-gasho-kamana-baxdo yaa bahgooni ah.

**B.**

1. Duufley, waa qofka rasan oo baaliga ah.
2. Dareenley, waa qofka markasta belo iyo baas fisha, ama waxsan ma fisha ah.
3. Daabley, waa kan markay dadka isqoomaan ama is-af dhaafaan, qaarta saara oo dilaaga ah.

**T.**

4. Xididki-xante waa qofka dadka ku xil leh wax xun ka sheega, oo xanlowga ah.
5. Xaajaduu-watey-ka-xog-warran waa kaan sirtiisa qarsan karin, intay siduu la rabey ugu fuleyso.
6. Xiluhuu-uureeyey-xoog-moode waa ninka afadiisoo xaamil ah hawsha ku hagrada ama ku halleeya, oo waxayna tabar u hayn ku dhiba.

**J.**

7. Surin-dheer-ka-dhaanshe waa ninka inan-la-yaalka ah, oo meel dhaanku dhawr babeen ka dhoxo cidda uga dhaansha.

Marka dhaanku yimaadaba xididkoo dhan baa biyaha wada cabba, oo haddiiba way dhammaadaan. In la arooro bay noqonaysaa, isagoo joogana dadka ku xil leh uma uu oggola. Markaasay dhaan kasta isaga iyo awrkiisu u jeebban yihiin.

Xishoodkaa badan darti, uu marna garan waayey inuu ka guuro si ay naftiisa iyo awrkiisu ku nastaan baa doqonta loogu daray.

8. Soor-quureed-cune waa kan wixii loo taago, oo laysaga jeediyaba iska cuna, oo aan sharaftiisa dhawrane hungurigu qaaday.

Kaasi waa barax la' yahay.

9. Sixun-u-warran, waa qofka wuxuu arko, wuxuu maqlo iyo wixii looga sheekeeyaba si xun oo beeni ku jirto, ama aan fiicnayn u sheega, oo warxuma-tashiilka ah.

X.

10. Gar-ma-gasho-kamana-baxdo, waa qofkaan waxba dhici karin, oo aan tala keenna ahayn tala raacna ahayn, ee qumbacaddihiisa ligligga haysta.

Tusaale ka midihi waxaa weeye, adigoo jaallahaa qalin ka qaatay, oo uu kaa jabay. Dabadeed, markaad isagiiyoo kale u keentana ku yiri, "Waxaan kaygii oo sidiisiiya ahayn ma rabo",

Xaggee laga keeni ?.

# IIMAAN BADNI

Nin aammin ah oo iimaan badan, magiciisana Gurxun la yiraahdo oo xaas iyo wiil yar leh, ayaa wuxuu u shaqayn jirey, nin taajir ah oo xoolihiisa laysu celin waayey. Dadkii uu hawsha la qorsheynayey, Gurxan waxay ku tixgeliyeen siduu xilka isaga ilaalin jirey iyo dhaga waddanaantiisa.

Goortuu midiidinkaasi in door ah hawshii hayey, ayuu xaq wuxuu u yeeshay saddex kun oo shilin. Markuu ogaadey inay lacagtiisu ku filan tahay, buu taajirkii wuxuu ku yiri;" "Waan tegayaaye xaqayga i sii", Suuye taajirkii; "Saddexdaada kun saddex talo ma ad iga dhaafsan?" Isagoon wax shakiya isgelin buuye; "Waxba kama qobo", intuu dib u xusuustay in talada qaarkeed ay maalka dhaanto. Markaasuuye taajirkii:

"Weligaa toobiye ha marin

Waxaan baddaa ahayna ha gelin

Meeshaad ku carootana dib uga noqo".

Ninkii isagoo fara maran buu meeshaas ka tegey, oo wuxuu is yiri aad talada u horraysa tijaabisid. Markaasuu toobiyihii looga digey ku dhacay. Siduu u soconayey buu niman qaaqaawan, oo dhabbihii dhex taagtaagan ku soo baxay. Markay isnabdaysteen buuye; "War maxaa saan idiin galay?" "Niman shufta ah ayaa meesha nagu dhacay", bay ugu jawaabeen. Markaasuu garwaaqsaday taladii taajirku siday u rumoowdey, oo toobiyuhu uusan bahal iyo col midna uga marrayn, isla markiina ka leexday oo hayjaddiisa xulay.

Goor barqadii ah, ayuu magaalo ku soo baxay. Mise Duqii magaalada xukumey baa gabar inta garbadduub u xiray, oo dhambacaad u jiifiyey barida jeedal kala dhacaya. Qofkii war gabadha sida u dhaan yiraahda, oo inuu ka qabto isku dayana iska dhagatiraya.
Gurxan inta agtiisa soo maray buu horay u dhaafay isagoon ju' u oran. Markaasuuye Duqii; "War soow Islaam ma tihid maxaad gabadha iiga qaban weydey?" Suuye Gurxan, "Adeer waxaan badday ahayn ma galo". Afkiisa markay ka soo baxday, ayaa Duqii gabadhii cilliinkii ka daayey, ooye; Waa kaas ninkaan doonayey waxaan hawshiis ahayn an gelin", saddex kun oo shilinna abaalgud isagii u siiyey.
Gurxan taddoba sano markuu baladkii joogey, ayuu meeshuu

reerkiisii ku ogaa dib ugu soo noqday, isagoo ku tashoon inuu xoolo iibsado.
Intuu tubta soo socdey, waddooyinka iyo hilimmadoo dhamba waa ka leexanayey, oo qardajeex buu ahaa. Taasna waxaa ku jirribay taladii hore oo uu cawaaqibkeedii ogaadey, iyo lacagtiiyoo u tarantay oo uu watey.

Goor uu guuraynayo, yaa geel koorti meel cabbaar u jirta uga baxday. Suu inta soo higsadey buu wuxuu ku soo baxay geel xeraysan, oo niman golihiisa ku waalaysanayaan dabna u shidan yahay.
Markaasuuye: "War maxaad sheegteen ?" "Nabad intaannu ognahaye adigu maxaad sheegtay ?", bay yiraahdeen. "Wax dareen ah ma ogiye ninka Gurxan la yiraahdo gurigiisii waa xaggee ?" buu yiri.
"Waa aqalkaas sii jeeda", bay ugu jawaabeen.

Gurxan guriga xaggiisii ayuu u daqaqamay, markuu aqalkii tegeyna wuxuu arkay afadiisii iyo nin raar ku wada jiifa. Amleey Jufana ah, oo saddexgees ah, buu inta galka ka jiitey wuxuu damcay inuu ninka kala gooyo. Markaasuu taladii saddexaad soo xusuustay, oo inta galkeedii ku ceshey nimankii dib ugu noqday.
"War maxaad beenta iigu sheegteen, soow tan aqalkii ninku dhex jiifo ?, isagii baa yiri.
Goortaasay inta qosal la dheceen yiraahdeen: Waa wiilkiisii isagoo yar uu ka tegey.
Gurxan kolkaasuu gurigiisii ku laabtay, isagoon wax dhiilla ahi ku jirin.

**M A C N A Y N**

| | | |
|---|---|---|
| **midiidinkaasi** | : | qawsaarkaasi |
| **toobiye** | : | waddo |
| **baddaa ahayn** | : | hawshaa ahayn |
| **shufta ah** | : | qawleysata ah, gaadashi ah |
| **amleey** | : | billaawe |
| **garwaaqsaday** | : | xusuustay |
| **qardajeex** | : | meelaan toobiye lahayn mariddeed |
| **Cawaaqib** | : | aayatiin |
| **u daqaqamay** | : | aadey |

## 1. Layli

1. Muxuu Gurxan caan ku ahaa oo lugu kuunyi jirey?
2. Intee shilin baa taajirka xaq loogu yeeshay? Muxuuse u bixin waayey?
3. Maxaa Gurxan magaaladii kala tegey?
4. Gurxan talooyinku say u ahaayeen ma u fuliyey?
5. Nimankii jidka joogey maxaa qaaqaawiyey?
6. Gurxan markuu nimanka tuban arkay dabadeed xaggee buu maray?
7. Duqa magaaladu habkee gabadha u xiray?
8. Gurxan markuu soo noqday muxuu damacsanaa?
9. Nimankii geela golihiisa joogey maxay ku hawshaysnaayeen? Ninkii u yimidse ma garteen?
10. Gurxan markuu aqalkii yimid sidee noqday? Muxuuse damcay?

**2. Erayadaan hoose waa khalade kuwa macnale ka dhig sida tan u horraysa, intabana sheekadaad ka heleysaa.**

| | |
|---|---|
| **raajit** — Taajir | rabbaac |
| **cagal** | gihdasey |
| **diiminid** | almeey |
| **iinama** | qacaawib |
| **jayhad** | cambadhaad |
| **urugaynayo** | yootibe |
| **deejal** | madaqaqay |

**3. Meelaha bambannaan erayada ku habboon geli, sida tan hore.**

1. Anigu berri **baan** Nugaal aadi **doonaa**.
2. Adigu berri ......... Nugaal aadi ......... .
3. Isagu berri ......... Nugaal aadi ......... .
4. Iyagu berri ......... Nugaal aadi ......... .
5. Annagu berri.........Nugaal aadi ......... .

6. Innagu berri......... Nugaal aadi ......... .

7. Idinku berri......... Nugaal aadi ......... .

8. Iyagu berri ......... Nugaal aadi ......... .

4. **Meelaha bambannaan oraahaha u qalma geli.**

1. Gurxan ......... iimaan ......... buu ......... .
2. ......... qaarkeed ......... ka ......... .
3. Gurxan ......... kun buu ......... u ......... .
4. Nimanka ......... joogey ......... furatay.
5. Duqa ......... gabadha ......... ka ......... .
6. Gurxan ......... ninka ......... dilaya ......... waa dhaafay.
7. ......... magaalada ......... soo labtay ......... buu sitey.
8. Isagoo ......... buu ......... koorti ......... .
9. Geel ......... oo niman ......... ku ......... buu u .........
10. Afadiisii ......... nin ......... ku wada ......... arkay.

5 **Weerahaan soo socda tii run ah horteeda R ku dhig, tii been ahna B.**

b. Gurxan wiil iyo laba xaas buu lahaa. ———

t. Taajirku ninkii u shaqeeyaba taluu xaqiisa ka dhaafsan jirey. ———

j. Nimanka jidka joogey tuug bay ahaayeen. ———

x. Shuftadu dadka hilinkay u fariisataa. ———

kh. Gurxan goortuu raggii waraystay buu jidkiisii ku gudbey. ———

d. Duqa magaaladu tijaabuu gabadha u dilayey. ———

r. Gurxan lacagta deyn buu Duqa ugu lahaa. ———

s. Intuu Gurxan magaalada joogey aad buu ugu gaajooday. ———

sh. Markuu Gurxan soo noqday wuxuu damacsanaa inuu ari iibsado. ———

dh. Ragga golaha ku waaleysanayey iyo ninku way isgaranayeen. ———

# NAAG MASAYRTAY

Waa aan dhaweyn, ayaa nin isagoo xaas leh mid kale la guursadey si uu u reer badsado, oo carruur badan u yeesho. Maxaa yeelay, waxaa deris la ahaa nin laba xaas iyo tobaneeye carruur ah leh oo ciidankiisu isku filan yahay, aan isagana ceel iyo carshin toona ka gargaarin. Markuu ninku arkay inay hawsha miyi cudud u baahan tahay buu xaaska dambe guursadey, si uu waraso badan u yeesho oo dhibta haysata uga kaaftoomo.
Meesha markaas ciddu taallaa waa Gobolka Nugaaleed.

Waxaa ayaandarro noqotay inaysan minweyntii la garan muraadkiisa, ee markay aragtay aqalka aqalkeeda ka feer dhisan ay masayr darti maryaha tuurtay. Wax lagu qanci karo buu siiyey, oo ku yiri; "Ficil baa ii geeyaye raalli ahaw reerkaagana dhaqo". Allaaba waa inay wax dhaqdee isaga naftiisii bay halis gelisey.
Markaasuu gabay nin hore tiriyey wax ku tusaaleeyey, oo ku yiri:

"Naag yahay illeyl iyo dharaar uubatada yeeri
Sida aar arbiyo geesi diley or iyo geeraarka
Goortii aroos dhuuman jirey gabay ambayntaada
Waxaan oogadaada ugu turay ul iga doonkaaga
Arrinkaad gafeysiyo waxaad eedi taladaada
Haddii adan istixiyoon haween edebi waw doore
Bal ogoow ammuurtaad waddaa arammigay reeoto".

Rabbi waanadii dheg iyo dhaban buu ka marshey, waxna kuma ay qaadan.

Habeenkii dambay wiil yar oo ay dhashay inta xambarsatay reerkii ka guuraysay, oo ciddoodiiyoo aan carrada joogin u ambatay.
Isagu habeenkaas aqalka minyaraduu u hoydey, oo war uma hayn guureheeda.
Salaaddii buu xaggooda u soo daqaqamay, oo is yiri aad soo bariidisid. Mise raadkeedaa dhilan, arigiina oodafadiisaa u dheer. Intuu murugoodey buu guurkii midda dambe qoomammeeycy, maxaa yeelay, wuxuu afada iyo wiilka uga baqsanaa dulinka hawd galeenka ah oo meeshaas ku badnaa.
Dabadeed, intuu dan cad uga baxay buu arigiisii foofsaday.

Haweeneydii habeenkaas ay tegeyso maalintii ka dambeysey, goor ay harka ba'aydiisii tahay bay waxay soo gaartey Buuraha Xargaga, oo Nugaasha Waqooyi-galbeed ku yaalla. Buurahaasi waxay u dhexeeyaan Laascaanood oo ah, Magaalamadaxda Degmada Nugaasha Waqooyi-galbeed, iyo Laasaddaar oo isla degmadaas ah.
Laasaddaar waa meesha nin inta ceelka ka qotay niman kale ka xoogeen, oo haddana inta mid kale meel ka qotay yiri; "Laasaddaar baa laygu ciilaye ceelow biyo keen".

Haweeneydii geed Yucub ah hoostiis bay ku nasatay, oo wiilkii naaska midig ku qabatay. Xoogaa hadday fadhidey, bay waxay aragtay wiilkiiyoo indhihiisu kor u jeedaan oo qoslahaya. Markaasay geedkii kor u fiirisay, mise nin dadqal ah baa fuushan oo wiilka marba wax tusahaya.
Iyadiiyoo maradii ka hambalaalaqsan tahay bay yarkii la booddey, oo cagaha wax ka dayday. Markaasaa dadqalkii meeshaas iska soo kawaan qaaday isagoo damacsan inuu qabsado, ayaandarrise bawdaa miraha noqotay. Dabadeed, hadal iyo hawraar wuxuu ka yiri;

"Cakuye Buuraha xargaga

Nin duulahayay dabraan

Nin xiimahayay xiraan

Bal naagtaas barida daya

Bal buluqbuluqdeeda daya

Fankiyo bawdada bal daya

Boolcaddahay sidatana bal daya".

Naagtii iyadoo guuraynaysa ayaa roob mirihi da'ay oo cirkiyo dhulkaba isqabsadeen. Kolkaasay waxay jirsatey god libaax, iyadoo yarkii xambaarsan. Markay in door ah dhex kuududdey, baa aar soo qarqaray u soo galay. Biyihii shucubkiisa ka tifqayey baa maryihii ka qooyey, say dhibicdii ku dhacdaba micidiisii bay mooddaa baqdin darla'. Habeenkaas inay nolol ka jaanqaadday bay la ahayd, nabadgelyeyse heshay.
Libaaxii goortii roobkii kacay buu godkii ka baxay, iyadiina markii waagu si fiican u beryey bay reerkeedii dib ugu noqotay iyadoo toobadkeen ah.

Haweenkii ay deriska ahaayeen bay wixii qabsaday uga sheekaysay, hawraarteediina waxay ku soo koobtay; "Gar libaax gonno, wadna baas galaw, naag dambaay dabaday didmo haw noqon".

## M A C N A Y N

| | | |
|---|---|---|
| **carshin** | : | daaqsin |
| **m i y i** | : | baaddiye |
| **hawakacay** | : | boodey |
| **minweyn** | : | xaaska hore |
| **minyaro** | : | ......... dambe |
| **uubatada** | : | qaylada |
| **ambayntaada** | : | guryankaaga |
| **istixiyoon** | : | xishoon |
| **jaanqaadday** | : | tagtay |

1. **L a y l i**

**W e y d i i n o :**

1. Xaggee baa ciduhu degganaayeen?
2. Maxaa ninku naagta kale u guursadey?
3. Minweyntu markay masayrtay wax ma la siiyey? Magici-isuse waa maxay?
4. Taladii saygeedu u soo jeediyey ma yeeshay? Muxuuse tusaale ku yiri?
5. Naagtu markay tagtay wax ma sidatey? Maxuuse ninkeedii ku ogaan waayey?
6. Markii waagu beryey muxuu ninku arkay?
7. Meesha naagtu dadqalka ku aragtay xaggee bay ahayd?
8. Naagtu markay carartay dadqalkii sidee yeelay? Maxaase ku dhacay?
9. Maxay haweeneydu godka u gashay? Yaase ugu yimid? Mase is-arkeen ?
10. Maxaa naagta maryaha ka qooyey? Maxayse is lahayd?

2. **Uyaaladaan soo socda iyo falkaabkooda erayo ku habsan raaci, sida tan u horraysa.**

Anigu haddeer baan sadcaalayaa.

Adigu haddeer ........ ....................... .

Isagu haddeer ........ ....................... .

Iyagu haddeer ........ ....................... .

Annagu haddeer ........ ....................... .

Innagu haddeer ........ ....................... .

Idinku haddeer ........ ....................... .

Iyagu haddeer ........ ....................... .

3. **Hadalladaan hoose macnohooda qor.**

| | |
|---|---|
| tobaneeye | dan uga baxay |
| kaaftoomo | foofsaday |
| raadkeedaa dhilan | harka ba'aydiisii tahay |
| oodafadiisaa u dheer | cagaha wax ka dayday |
| raadcayn lahaa | hambalaalaqsan |
| | bawdo miraha noqotay |

4 **Erayadaan hoose kuwo macna leh ka dhig sida tan u horraysa.**

| | |
|---|---|
| samayrtay (**masayrtay**) | duukud |
| waheeney | dawbo |
| sambahalaqalan | alabala |
| abuutada | ragxaga |
| neebkahaas | laqdad |
| adascaanool | bilaax |
| cuyub | |
| raxtaambay | |
| raqraqay | |

5. **Meelaha bambannaan erayada ku habboon geii.**

1. Ninku wuxuu ......... u guursadey .........carruur.........yeesho
2. Reerkiisa ......... aad ......... ugu ......... .
3. Ciduhu ......... degganaayeen ......... Waqooyi-galbeed.
4. ......... wiilkii .........bay ......... tagtay.
5. ......... Xargaga ......... u dhexeeyaan Laascaanood ......... Lasaddaar.
6. ......... waxay ......... wiilkii ......... qoslahaya.
7. ......... wax ......... wiilka ......... .
8. Markii ......... da'ay ......... gashay god ......... .
9. Goortay in door ah ......... kuududdey ......... libaax u ......... galay.
10. ......... waagu beryey ......... hoygeedii ......... noqotay.

6. **Weerahaan hoose tii run ah horteeda R. ku dhig, tii been ahna B.**

b. Ninku wuxuu u guursadey naaga jecli. ———

t. Minweyntu iimaan ma lahayn. ———

j. Minyaradu tegiddii tan han way ku faraxday ———

x. Markii ninku bahdii weyneyd waayey aad buu u naxay.———

kh. Intaan harku gelin bay naagtii Buuraha Xargaga soo gaartey. ———

d. Goortay geedka ku nasatay, naaska bidix bay wiilkii ku qabatay. ———

r. Dadqalku markuu naagta iyo wiilka arkay buu soo boodey. ———

s. Haweeneydu markay dadqalkii aragtay bay qoob iyo qaylo isku dartay. ———

sh. Godka libaaxu waa kan dawacadoo kale. ———

dh. Libaaxu naagta waa arkay, wiilkase ma arag. ———

hadday idin aragtana idin deyn meysee iga taga".
waxay yiraahdeen, "Walaalley ma socon karnee na qari".
Cabbaar hadday aamusnayd, bay guriga raartiisa ku qarisay oo tiri; "Anigu dadka hilibkiisa ma cuno, waxaana jeclahay inaan idin raaco. Marka si kale u baxsan maynee, goortay seexato yaa dhegta dheeri dhacdaaye aan markaas dilno".

Arrintaas ay u soo jeedisey aad bey ugu riyaaqeen, farxad weyn oo aan ku jirinna way gelisey.

Fiidkii markay tahay, ayaa Dhegdheer oo wiil tima cas oo ay soo dishey sidata gurigii timid. Saa waxaa u soo uray gabdhaha naasohoodii iyo timohoodii. Dhegdheer waxay dareentay inay gabdho guriga ku jiraan, markaasay gabadheedii ku tiri; "Hooyo naas gabdheed baa ii soo uraye soo saar qoonka aad guriga ku garinayso. "Hooyo waa kayga", gabadhii baa tiri iyadoo naxsan. "Naa awalba iima uri jirine ma soo bixin uunka?", Dhegdheer baa inta gabadhii indhaha ku fagiijisay si canaana u tiri. "Ma iga ballan qaadaysaa inaadan u hunguriyooneyn?", bayte gabadhii isagoo hadalkeedu dabacsan yahay. "Haah", bay Dhegdheer tiri.

Gabadhii inta inamihii soo bixisay ayay habartii u keentay, oo isbartay. Markaasay Dhegdheer afartoodii mid qoryo u dirsatay, midna dabka ii shid tiri, midna wiilka ii qal tiri, midna injirta iga gur.
Intii injirta laga gurahayèy bay Dhegdheer seexatay, saa dhegtii dheeraydbaa dhacday. Gabdhihii intay isu yimaadeen, bay digsi dabka saarna oo biyo kululi ka buuxeen dadqalatadii madaxa u gasheen. Habeenkaas baa Dhegdheer naf weydey, iyadoo looga raalli yahay.

Meesha dadqalatadaasi degganeyd weligeed roob kama di'in, oo abaar naahuura ah bay ahaan jirtey.
Markii waagu dillaacay, yaa gabdhihii haan qabsadeen ay Hashood uga roob doonayaan. Haantii bay waxay ku yiraahdeen:

"Alloow roone roobeey
Aamiineey Allahayoow.
Dhegdheer dhimatay roobeey
Aamiineey Allahayoow.
Dhul waa nabade roobeey
Aamiineey Allahayoow.
Alloow roob na siiyeey
Aamiineey Allahayoow.

Maalintaasaa rob badani meeshii ka da'ay oo carradii doogsatey.

Degmadii carradaas ka dhaweyd, baa waxaa u muuqday madaxyada iyo mayayga roob oo meeshii Dhegdheer degganeyd ka dul hooray. Baqdin iyada laga qabey aawadeed, afar nin oo faras ah ayaa meeshii roobku ka da'ayey inay soo arkaan loo qaybshey. Dhegdheer qof si ba'an u dheeraysa bay ahayd, nin faras kaga baxsadana ma ahee addimma kale nin kaga baxsada lama sheegin. Sidaas darteed, baa nimanka fardaha wata loogu diray.

Nimankii waxay u yimaadeen gabdhihiiyoo sheekaysanaya iyo dadqalatadii oo meyd ah. Iyagoon fardihii ka degin bay gabdhihii waraysteen. "Dhegdheer nin dambe wax yeeli meysee naqa ha ka dibjirina", gabdhihii baa yiri. Dabadeed, afartii nin baa iyagii kala guursadey, naqiina waa lagu caana maalay.

Waa dambe, ayaa odaygii wuxuu maqlay in gabdhihiisii la guursadey, oo ay carruur yeesheen. Suu waa soo aadey, oo tii ugu weyneyd u yimid. Markaasay ku tiri; "Horaad ii ambisaye i dhaaf". Tii dhexe, Samayo, ayuu haddana u yimid.
Kolkaasay inta hargaweylaalis u gogoshey wan buuran u qashay, oo sarariihiisii iyo subag badan siisay iyadoo baan uga dhigaysa. Waa ninkaas qatooyada ku raagaye, habeembarkii buu barwaaqadii ku lammay oo gogoshii afka marshey. Markaasuu reerkii ka guureeyey isagoo leh:

"Alloow Samayooy an lagu dhalin
Alloow sumaloow an lugu qalan
Alloow sarareey an lugu cunin
Alloow subagoow an lagu gadan"

Middii ugu yarayd oo ninkii ka maqan yahay buu aroorya bore u yimid, markaasay si fiican u soo dhaweysey. Intay caano siisay bay arigii u gashay.
Suuye; "Aabbe catir i sii". "Aabbe aqalka kala soo bax", bay tiri. Intuu aqalkii galay, buu wiil yar oo gabadhu dhashay ciddidii dheerayd caloosha kaga jeexay isagoon ula kasayn.
Oohintii yarka iyo isagoo dhawaaqay naxdin awgeed, ayaa inta arigii diday wan sanku jabay, oo geelii inta isna diday hali bawdo ka haaddey, gabadhiina qarracantay.

Intii xooluhu kala yaacayeen buu orgi sogob ah la cararay, oo hawdkiisa la xulay.
Isagoo barqadii meel la marahaya,oo waxa qabsaday garwaaqsi-

6. Koortu **wuu** dhawaaq dheer tahay
7. Gabdhuhu **way** inamo waaweyn.
8. Dadqalatadaasi way **hurdaa.**
9. Dabku dhaxantuu **kuu** kacshaa.
10. Wiilka **ciddidav** nabar gaarsiisey.

**5. Meelaha bambannaan erayada ku haboon ku qor.**

1. Catir ......... ku ......... sabool ......... ahaa.
2. Marka ......... la siiyo ......... buu ku ......... jirey.
3. Gabdhuhu caanaha ......... ku .........jireen.
4. ......... berrinka ......... bay ka .........
5. Odaygu koortii ......... buu ku .........
6. Dadqalatadu ......... seexatay baa dhegtii ......... dacday
7. ......... biyo ......... ku jireen oo ......... saarnaa, ayay ......... madaxa u gasheen.
8. ......... markay ......... qabsadeen ......... roob .........
9. ......... ciddidii ......... buu wiilkii ......... kaga .........

**6. Weerahaan hoose tii run ah horteeda R ku qor, tii been ahna B.**

b. Odaygu nin iimaan daran buu ahaa. ———
t. Afadiisu raalliyo wacan bay ahayd. ———
j. Subixii odaygu gabdhaha kexeeyey habartaa kula dirirtay. ———
x. Markuu gabdhaha ambinayey, wuxuu rabey inay afadiisu labeenta ku subkato. ———
kh. Goonku waa miro dhulka laga qodo, oo qolof leh. ———
d. Gabdhihii Edbbe wuu uga raayey siduu aabbohood la damacsanaa. ———
r. Habartood markay ayaamo weydey bay soo doontay. ———
s. Dhegdheer nimankii fardaha watey baa xabaalay. ———
sh. Nimankii gabdhaha guursadey yarad bay baxsheen. ———
dh. Gabadhii weyneyd iyo tii dhexe mid baa aabbeheed soo dhaweysey. ———

# DAACAD, SIRROOW IYO BEENLOW

Maalin baa waxaa wada sadcaalay saddexda nin oo magacyadoodu kor ku qoran yihiin, oo midba midka kale ay markaas ugu hor tahay.
Mid waliba wuxuu sitey sahaydii uu tubta ku mari lahaa. Daacad saadkiisu wuxuu ahaa Kiilo timir ah, Sirroowna wuxuu soo saatey bur shiilan, Beenlowna xabbad muufa ah. Saddexdoodu waxay ku heshiiyeen inayna isa sirin oo ay jaalloobaan, iyo inay afar iyo labaatan saacadood markay joogaamba mid saadki cunaan.

Markay muddadii u horreysey dhammaatay, yaa labadii kale waxay Daacad ku yiraahdeen; "Keen timirtaada cunnee. Daacad ballankii ka dhexeeyey buu aamminsanaa, waxna kuma u diidin, halkaasaana sahaydiisii lagu calfaday. Waxay socdaamba, muddadii dhexe markay joogaan buuye Daacad; "War naftaa na haysee wax noo dhiiba". Markaasay inta qosol jilbaha goosteen waxay ugu warceliyeen; "Ninkaan wax sidan baa ba'ay, adeer annaga hanna baryine Ilaahaa bari". Suuye; "Haddee waxaygii ii cesha". "Kuma annaan xoogin", bay ugu dambaystii yiraahdeen inkastoo Beenlow muufadii wax yar uga jabshey.

Iyagoo maalintii oo dhan dhalandhool ahaa, oo asqo darteen ay beercaddaad yihiin, bay socotadu ceel ay ka cabto oo daasadi qarkiisa saaran tahay yimaadeen. Intay maryohoodii oo dhan tafaha isugu xireen bay Daacad gacanta midig uga sirqiyeen, oo ceelkii u daruuriyeen si uu uga soo waraabsho. Daacad gacanta bidix buu daasaddii ku qaatay, oo yiri; "Markaad dheregtaan ceelka iga soo baxsha". Hawraarsan", bay yiraahdeen siday run sheegayaan.
Daacad markuu daasadda buuxshaba maraduu ugu soo xiraa, say waa ka tuurtaan. Markay labadoodii dhergeen bay isagiiyoo ceelkii ku jira uga dhaqaaqeen. Goortuu arkay inay ka tageen buu soo gebiraacay, ayaandarrise ceelka qarkiisa dhagax ku yiilley baa la ruqay, markaasuu hoos u noqday, sinna ka haadey oo biyihii dhex habsadey.

Subax dambe, ayaa niman safarihi ceelkii yimaadeen, oo wadaan u riteen. Wadaantii buu Daacad soo fuulay, labada gacmoodna xariggii ku soo qabsaday illaa waa ninkaas dhaawaca ahe. Bannaanka markuu yimid buu arrintu siday ahayd iyo wixii qabsadayba uga warramay, markaasay cunto siiyeen geed meesha u dhawaa oo hoos badanna geeyeen.

Markii habeenku laba isu dhigay, yaa Jinni aroorihi ceelkii yimid. Jinnigu Insiga wuxuu ku naynaasaa "Shan faroodle". Mid baa wuxuu mid kale ku yiri; "Hebeloow Shan faroodle waxba ma oga, maxaa yeelay geedkaas caleentiisu indhahay daawo u tahay. Tan kale, haddii aayad hebla', gabadha curyaanta ah oo Boqorku dhalay lagu akhrin lahaa waa biskoon lahayd. Waxaa ka daran, buurtaas dahab baa dhanka bidix uga jira".

Geedka ay sheegayeen waa kan Daacad joogey, isaguna warkoodoo dhan waa maqlayey wax cabsiyihina kama gelin.

Markuu laba toddobaad meeshii joogey oo uu biskoodey, buu inta caleentii geedkii ka gurtay magaaladii Boqorku degganaa aadey. Isagoo caleentii xambaarsan buu Boqorkii u tegey, kuna yiri; "Haddaan gabadha daweeyo ma igu meherineysaa?" Suuye, Boqorkii; "Awal baan ka samraye waa ku kaas, haddaad daweysana waa xaaskaa."
Markuu laba cirgaduudood aayaddii ku akhriyey bay sarakacday, oo asaaggeed wax la qaybsatay. Boqorkii ayuu haddana wuxuu ku yiri; "Inta indhaha la' daawadoodaan aqaane hala ii keeno." Kii loo keenaba biyo caleentii uu ku qasay buu isha kaga dhibciyaa, markaasay u biskootaa.
Dabadeed, buurtii dahabku ku jirey buu Boqorkii ayaan dambe u sheegay, markaasaa laga soo baxshey oo isagii saddex meelood laba la siiyey.

Galabtii dambe isagoo dad badani geesaha ka fadhiyaan, yaa Sirroowgii iyo Beenlowgii u yimaadeen. Waxay cunaan iyo waxay cabbaan buu siiyey, si kalgacayl badannna waa u soo dhaweeyey.
Intii meesha la fadhiyey ayaa Beenlowgii inta Sirroowgii dhegta afka u saaray wuxuu ku yiri; "Daacad ceelkii aan ku ridney buu khayr ka soo helaye ina keen annana aadnee." Gabbalku markuu dhacay bay labadoodii israaceen oo ceelkii aadeen, markay tageenna afka isaga tuureen iyagoon docna deyin.

Caweysin dambe, ayaa Jinnigii oo aroorihi ceelkii yimid. Markaasaa kii habeenkii hore wuxuu kii kan ku yiri; "Habeenkii aan halkaan joogney Shan faroodlaa ina maqlayey, oo ceelka ku jirey". Suuye kii; "Maxaad ku ogaatey?" "Waxaan ku ogaadey, gabadhii curyaanta ahayd oo caga yeelatay, dadkii indhaha la'aa oo la daweeyey iyo Buurtii oo dahabkii lagala baxay ayaan arkay", buu yiri.
"Hadda maxaan yeelnaa?", mid baa weydiiyey. Suuye; "Aan ceelka aasno Shan faroodlaa ina ku bartaye." Markaasay inta ceelkii afarta gees ka mareen xabaaleen, afkana ka malaaseen kuwiiyoo ku jira.

**M a c n a y n :**

| | | |
|---|---|---|
| **sahaydii** | : | saadkii, jiscinkii |
| **tubta** | : | jidka |
| **muddadii** | : | goortii, waqtigii |
| **calfaday** | : | cunay |
| **dhalandhool** | : | harwaraable |
| **beercaddaad** | : | dhanqalan, harraad daran |
| **daasad** | : | koombo |
| **gebiraacay** | : | taagtaagsaday |

**1.** **L a y l i**

**W e y d i i n o :**

1. Maxay saddexda nin ku jaalloobeen ??
2. Mid walba sahaydiisu maxay ahayd ?
3. Muddadii u horreysey maxay cuneen ? Tii dhexese yaa carooday ?
4. Daacad muxuu ceelka ku galay ? Muxuuse u qaatay ?
5. Labada kale markay wabxeen maxay yeeleen ?
6. Daacad markuu wadaanta soo fuulay ma fayoobaa ?
7. Intee ayaamood buu Daacad geedka joogey ? Faa'iidase ma ka helay ?
8. Gabadha Boqorku dhalay ma ayaantii Daacad u yimid bay biskootey ?
9. Muxuu Daacad dadka indhaha kaga shubay ?
10. Markay Sirroowgii iyo Beenlowgii Daacad u yimaadeen maxay moodeen ? Ma kase aargutey ?
11. Maxay Jinniyadu ceelka u aaseen ? Waxse ma ku jireen ?
12. Maxaa Daacad u guuleystey ? Maxayse iyagu u halligmeen ?

2. Magaca uyaalladiisu waa dhawr jaad. Waxaan ka soo qabsanaynaa qaybta u horraysa oo weero ku tusaalaysan.

| Uyaallo | Weero ay ku jiraan. |
|---|---|
| 1. Ani | Anigu waa seexday. |
| 2. Adi | Adigu waa seexatay. |
| 3. Isa | Isagu waa seexday. |
| 4. Iya | Iyadu waa seexatay. |
| 5. Anna | Annagu waa seexannay. |
| 6. Inna | Innagu waa seexannay. |
| 7. Idin | Idinku waa seexateen. |
| 8. Iya | Iyagu waa seexdeen. |

3. Meelaha bambannaan uyaallada qaybtooda ku habboon geli.

| Uyaallo | weero |
|---|---|
| 1. Aan | Waa aan (waan) cabbey. |
| 2. ...... | Waa ...... (......) cabtey |
| 3. ...... | Waa ...... ( ...... ) cabbey. |
| 4. ...... | Waa ...... ( ...... ) cabtey. |
| 5. ...... | Waa ...... ( ...... ) cabney. |
| 6. ...... | Waa ...... ( ...... ) cabney. |
| 7. ...... | Waa ...... ( ...... ) cabteen. |
| 8. ...... | Waa ...... ( ...... ) cabbeen. |

4. Hadalladaan hoose macnohoodu siduu meeriska ugu jiro u qor.

jilbaha goosteen
u daruuriyeen
beercaddaad yihiin
uga sirqiyeen
ka tuurtaan

la ruqay

dhaawaca ahe

waagu dillaacin

ka haadey

ka malaaseen

5. **Meelaha bambannaan erayada ku habboon geli.**

1. Nimanku ......... isu ......... raaceen inay .........
2. Midba ......... sitey ......... uu jidka ku .........
3. Saadkoodu ......... kala .........
4. ......... burkiisii ......... wax kama .........
5. Goortii ......... Daacad ........... muufa ah ......... cunay.
6. Markay ......... ceelka ........., maryohoodii bay ......... isugu .........
7. ......... markuu ......... gebiraacay bawduu ka .........
8. ...... Jinniyadu ......... Daacad ......... maqlayey.
9. ......... waxay ku ......... aayaddii hebla' ahayd.
10. ...... waxay ogaadeen ......... la maqlayey ......... hore.

6. **Weerahaan hoose tii run ah horteeda R ku qor, tii been ahna B.**

b. Saddexda nin markay israacayeen labaa isyiqiinney. ______

t. Markay wax badan socdeen bay timirtii cuneen. ______

j. Sirroowga iyo Beenlowgu waxay Daacad ceelka uga soo baxshaan bay waayeen. ______

x. Daacad geedka wax buu ku sugayey. ______

kh. Jinnigu Insiga waa arkaa, Insiguse isaga ma arko. ______

d. Shan faroodle Jinnigu wuxuu oran jirey wixii af iyo ilka leh. ______

r. Gabadhii curyaanta ahayd waa la guursadey. ______

s. Daacad dadkii indhaha la'aa caleentii geedkuu indhaha kaga bitiyey. ______

9. Dahabku buurta dhanka bidixda ah buu kaga jirey. ———

10. Jinniyadu markay Sirroowga iyo Beenlowga arkeen ayay ceelka ku xabaaleen. ———

**Maahmaahyo:**

1. Imaan badani waa uur muggiis.
2. Waxaan calaf ahayna lama cuno waxaan had ahayna looma dhinto.
3. Sir ma qabe Allow sahan maqan.
4. God walaalkaa ha qodin, haddaad qoddana ha dheerayn ku dhici doontidaana ma ogide.

# QOSOL IYO MAAD
## (dhurwaa)

Dhurwaa baa maalin wuxuu martiqaaday inta habar dugaag ah, dad iyo duunyo. Markii meeshii la isugu yimid buu wuxuu ku yiri; "Waxaan idin ka codsanayaa magaca Dhurwaa la yiraahdo in layga baddalo, oo Aammin la ii baxsho. Maxaa yeelay, anigu dugaagga kale wax ma dheeri ee si xun baa la ii fahmey".

Martiqaadkii goortuu dhammaaday bay inta ri' geed ku xireen dhurwaagii waxay ku yiraahdeen; "Aan ridaas salaaddii kuugu nimaadno haddaad aammin tahay".

Saqda dhexe habeenkii markuu ku cidlaystay buu ridii cunay, oo hungurigiisii ballankii hilmaansiiyey.
Markii waagu beryey bay u yimaadeen, oo Aamminoow, Aamminoow ugu yeereen. Suuye inta cararay; "Ninkii wax aammaan geliyaba Aamminoow ugu yeera".

## ROONAANA RABBAA OG

Reermiyigu badanaaba waxay degaan meel ceelka ka durugsan, iyagoo daryeelaya daaqsinta xoolohooda. Roobabka hore wixii ka dambeeya ceelka agaggaarkiisu xaaluf bay noqotaa, oo carshintaa ka dhammaata. Waxa sidaas ugu wacanina waa qoobka xoolaha iyo cagta badan, oo weligood ceelku meeshuu ka dhaw yahay ku badan.
Marka harooyinka iyo balliyadu guraan, waxay u dhansadaan meeshii hadba ceel ugu dhaw inkastaba haw jiree. Marbana inta dhaanku ka maqan yahay magac bay u leedahay ay ceelka fogaantiisa ku yaqaanniin, waxaana ka mid ah Saddex-subaxle.

Meel dhaanku habeenno ka dhoxo, yaa waxaa ka soo wada dhaansaday oday awrkiisu dadqaad yahay iyo niman kale. Odaygu wuxuu islahaa awrku yuusan ku diline nimanka ·la kaasho, iyana waaba ka xumaayeen ila rara iyo ila furadiisa.
Goortay maalintiiyoo dhan socdeen, bay habeembarkii geed duggi dhaankii ku furteen, oo yare seexdeen. In cabbaar ah markay jiifeen, baa nimankii inta awrtoodii rarteen odaygiyoon baraarugin iyo awrkiisii ka guureeyeen.

Hadday kedin sii maqnaayeen ayuu toosay, mise awrkiisii baa agfadhiya wax kalana lama arko. Isagoo yare baqsan buu sarakacay, oo yiri; "Roonaana rabbaa og, rombase", si geesinnimo ku jirtana awrkiisii u rartay.
Inkastoo odaygu aad awrka uga baqsanaa, haddana Eebbe hebed buu uga dhigay, oo waxba ma yeelin.

Markuu dhawr saacaddod soqdey buu wuxuu arkay wax waddada dhex yaal, oo aan madax lahayn, gacmana lahayn, lugana lahayn, oo iska gariirahaya ooga dadna leh. Odaygii beerkaa inta loo dhaafay buu istaagey;
Markaasuye wixii gariirayey; "Maandhoow aan kuu duceeyee awrka i saar".
Isagoo naxsan buu awrkii fariisiyey, oo intuu kor u soo qaaday gurada u saaray.

Goortay qundhucadu soo baxday buuye wixii: "Khayr qabe meeshaanaan rabaye i deji". Dib buu u dhugtey, mise Shiikh garku jilbaha joogo oo tusbax dheer haysta, quruxna badan baa awrkii saaran!
Markaasuu awrkii arrumay, oo halkiisii ku dejiyey. Suuye Shiikhii. "Waxaad yeeshaa, waddadu markay kala leexato tan midig qaad. magaalada Darmaan markaad tagtana gabadha ina Boqor ah, oo

yaa guursanayooy la oran doono aniga dheh. Gabadhaas, sagaal iyo sagaashan nin baa guursatey, oo mid walba habeenkii loo aqalgeeyey xijaabtey. Marka adigu labadaan qori oo yaryar qaado, markii aad u tagtana mid gawska dambe gasho."

Odaygii waddada kala bayrkeedii marku gaarey, ayuu tii midig qaaday. Goortay casar dheer tahay, oo uu daaley buu magaaladii yimid. Markaasuu wuxuu maqlay nin leh; "Yaa gabadha Boqorka lagu xiraayeey ?" Suuye "Aniga". Isla markiiba inta la kexeeyey baa lagu meheriyey, fiidkiina laysu aqalgeeyey.

Markuu aqalka sii galayey buu qorii gawska midig gashaday, si habsamiyana gabadhii ula soo fariistay. Intay gacanteeda midig garbihiisa ka kala ridatey bayte; "Toolmoone inaadan soo gelin baa kuu roonayd". Intuusan u warcelin baa mas weyni sariirta hoosteeda ka soo kudey, oo ninkii qaniinyo goostay. Meeshuu odaygu ka dhiman lahaa ayuu maskii naf waayey, taasna waxaa ku wacnaa qoriguu gawska gashaday.
Habeenkaas ka hor gabadhu welwel la'aan ma ay seexan, si ayna weligeed u gam'inna hurdadii baa uga soo go'day.

Maskaas Boqorka ayaa meesha geshey, gabadha keliyaana la ogeyd, waana bahalka raggii iyada guursan jirey oo dhan laayey. Waa hore, ayaa Boqorku wuxuu ku riyooday in marka maskaasi dhinto uusan isna ka dambeyneyn.

Intaan waagu beryin ayay labadoodii kafantii ninka loogu talagalay maskii ku duubeen, oo naxashkii ragga lagu qaadi jirey ku rideen. Markay laba saac tahay yaa nimankii meydka duugi jirey naxashkii qaadeen, iyagoo u qaba in ninkii ku jiro. Goortay godkii geeyeen bay kafantii mas bakhtiya ku arkeen, markaasay Boqorkii u war geeyeen. Markuu ogaadey in maskii dhintay ayuu riyadii soo garwaaqsaday, oo halhaleel gabadhii iyo ninkii ugu tegey. Isla markiiba Boqorkii, Xilkii Boqortooyada ayuu ninkii ku wareejiyey, iyadiina xoolihiisii dhaxalsiiyey. Halkaasaa isagii isla maalintii ku geeriyoodey oo uun aakhiro noqday.

Nimankii odayga habeenkii hore ka guureeyey, markay waddadii kala leexatay bay tii bidix u weecatay qaadeen oo col ceelkii fadhiya ka kor dheceen. Halkaasaana iyagii gudha looga wada jaray.

**M a c n a y n :**

| | |
|---|---|
| xaaluf | : caws la'aan ama daaq la'aan |
| harooyinka | : ballida waaweyn |
| baraarugin | : toosin, hurdo goyn |
| kedin | : cabbaar |
| qundhucadu | : qorraxdu |
| kafantii | : maradii meydka lagu duubi lahaa |
| naxaskii | : santuukhii meydka lagu qaadi lahaa |
| guureeyeen | : habeembar-keceen |
| hebed | : wax ku oggol |
| toolmoone | : wanaagsane |
| xijaabtey | : dhintay |

## 1. L a y l i

**W e y d i i n o :**

1. Maxay reermiyigu badanaa ceelasha uga fogaadaan ?
2. Markay meel ceelka ka fog deggan yihiin sidee biyo ku helaan ?
3. Waxay ceelku intuu u jiro ku yaqaanniin maxaa ka mid ah ?
4. Odayga awrkiisu muxuu awrta kale kaga duwanaa ? Muxuuse gooni ugu wadan waayey ?
5. Nimanku maxay la socodkiisa uga xumaayeen ?
6. Odaygu markuu toosay hadalkuu yiri muxuu ula jeedey ?
7. Markuu Odaygu meeshii ka tegey muxuu ka baqayey ? Maxaase markii dambe uga darnaa ?
8. Waddadu markay kala leexatay dhankee buu u weecday ?
9. Magaaladii odaygu tegey magaceeda macnihiisu waa maxay?
10. Muxuu maskii gabadha u cuni waayey ?
11. Intee nin baa ina Boqor guursatey ?
12. Muxuu Boqorku xilkii saarnaa ninka ugu wareejiyey ?

2. **Hadalladaan hoose macnohooda qor.**

| | |
|---|---|
| daryeelaya | si habsamiya |
| daaqsinta | ka kala ridatey |
| saddex - subaxle | naf waayey |
| dadqaad | ka dambeyneyn |
| gawska dambe | uun aakhiro |
| kala bayrkeedii | Xilkii Boqortooyada |

3. **Meelaha bambannaan magac-uyaallada qaybtooda ku habboon geli, adigoo tan ugu horraysa tix raacaya.**

**Uyaallo**

| | |
|---|---|
| 1. I | Ninku hilib buu i siiyey. |
| 2. ...... | Ninku hilib buu ...... siiyey. |
| 3. | Ninku hilib buu siiyey. |
| 4. | Ninku hilib buu siiyey. |
| 5. ...... | Ninku hilib buu ...... siiyey. |
| 6. ...... | Ninku hilib buu ...... siiyey. |
| 7. ...... | Ninku hilib buu ...... siiyey. |
| 8. | Ninku hilib buu siiyey. |

4. **Weerahaan hoos ku qoran meelaha aad u madow laaxinka ka saar.**

1. Ceelku biyuu **leedahay.**
2. Carshinta duunyadaa **cuna**.
3. Reermiyigu awrtay **dhaansataa.**
4. Odayga **awrkeedu** dadcun buu ahaa.
5. Nimankii **bay** saqda dhexe dheelmaday.
6. Eebbe hebed buu uga **dhigtay.**
7. Odaygu weli waa **xooggooneyd.**
8. Waddadu waxay u kala **leexaday** midig iyo bidix.
9. Boqorku waa **horay** riyooday.
10. Nimankii markay ceelkii tageen baa col **laystay.**

5. **Meelaha bambannaan erayada ku haboon geli.**

1. Ceelka ......... laga ......... .
2. Roobabka ......... wixii ka ......... ceelka agtiisu ......... ma leh.
3. ......... haamahay ......... ku ......... .
4. Awrta ......... iyo ......... waa ......... dhaanshaa.
5. Odaygu ......... awrka ......... haysey buu ......... u raacay.
6. Geed ......... bay ......... ku ......... .
7. ......... wax ......... buu waddadii ku ......... .
8. Markuu ......... tegey ......... gabar ......... naadinayo ......... .
9. Casar ......... baa labadoodii ......... meheriyey.
10. ......... baa ......... qaniinya ......... .

6. **Weerahaan hoose tii run horteeda R ku dhig. tii been ahna B.**

b. Agaggaarka ceelku waligeed waa doogsan tahay. ———
t. Awrta maalintii keliyaa la dhaansadaa. ———
j. Doonku hadduu biyaha haamaha lagu keeno cabbo wuu bukoodaa. ———
x. Odaygu nimanka wehel buu ka rabey. ———
kh. Ratiga odaygu dadkuu dili jirey. ———
d. Odaygu intuu waddadii ka leexday buu wax bahal u eg arkay. ———
r. Qorraxdu markay soo baxday, buu wax uusan ku ogeyn awrkii ku dul arkay. ———
s. Iyadoon waddadu kala bayrin bay Magaalada Darmaan soo gashay. ———
sh. Boqorku wiilal ma lahayn. ———
dh. Gabadhu odayga ka hor waa naxsanaan jirtey. ———

# DARDAARAN AABBE

Marka qof kasta oo weyni uu dareemo inay dhimashadiisii soo dhawaatey, dadkiisuu la dardaarmaa, maalkiisana waa dhaxalsiiyaa.
Waalidku intuu nool yahay dhashiisa waa u xoojiyaa waxna waa baraa siday naftooda, dadkooda iyo dalkoodaba wax u taraan. Marka uu dhimanayana wixii tala ah iyo wixii hantiyaba oo uu hayo buu ku dhaafaa.

Nin maalqabeen ah, oo laba xaas leh ayaa markuu dhimanayey saddex wiil oo uu aabbe u ahaa la dardaarmay. Inkastoo dardaarankiisu uu badnaa, waxaan ka soo qaadanaynaa middii ugu darnayd. Markuu wax kasta u falanqeeyey, buu ugu dambaystii wuxuu yiri: "Saddexdiina mid baanan dhalin, waxaana idiin sheegi doona saddexda nin oo meel hebla' deggan midka ugu weyne u taga". Markay arrintaas wiilashii maqleen ayaa mid waliba intuu isaga ismoodey hurdo iyo hoyaatimba ka tegey naxdin awgeed.

Saddexdoodii ayaan dambay isa soo raaceen,oo meeshay nimanka ku maqleen soo aadeen si ay u kala baxaan. Goortay afar caanamaal lug ahaayeen ayay raaskii kuwii kale degganaayeen yimaadeen, oo oday harab ah oo caaqiiba gabihi kuududo. Odayga madaxiisu noxosh buu ahaa cirro darteed, labada indhoodna intuu isku jabsaday baa cayayaanka qaarkiis u quuddarroonayey. Tan kale, dadka dhagaha culus kuwa ugu daran buu ka mid ahaa, oo aan durba wax maqlin. Odayga midabkiisu aad buu u gubnaa inkastuu markiisii hore qurux u dhashay.

"War maxaad sheegtay ?", bay yiraahdeen. Suuye, "dhaxantaan biyo cabbi mahayo". "Annagaamba biyo wadane noo warran", iyagii baa yiri. Markaasuuye, "Waxaad tiraahdeemba idinkaa ah", intuu moodey inay caayahayaan suu maqalkuu ka liitaaye. Intay ku soo dhawaadeen baa mid kor wuxuu u yiri; "War reerkii goormuu guurey, xaggeese u guurey? Suuyeen inta si fiican u maqlay, "saakuu meesha ka dareeray, meel uu aadeyse ma sheegi karo". Hadalkaasi markuu odayga afkiisa ka soo baxayey codkiisu waa gariirayey, si wacanna erayadiisa uma kala qeexayn.

In yar dabadeed, ayay reerka raadkiisii qaadeen, iyagoo ka naxsan odayga cidlada looga kala tegey iyo tabar la'aantiisa. Markay in door ah socdeen, bay oday kale oo ul ku tukubaya oo raadkii cidda humhummaagsanaya ka daba yimaadeen. Iyagoon la hadlin bay midkaas horay u dhaafeen milicda awgeed.

Salaadda duhur intaan la tukan, qorraxduse ay aad u kulushahay bay awrtii oo xero tuban ka daba yimaadeen. Waxa cidda wadaa waa oday weyn, hase, yeeshee xooggoon iyo haween keliya. Markay isnabdaysteen ayay waxay yiraahdeen; "War nin yahow idinkaan idiin soconnaye kumaad ahayd? Suuye, "Kii weynaa baan ahaye geedkaas Bilcilka ah sii taga." Intayna dhaqaaqin buu dhiil caana ah awr taagan ka soo furay, oo istaagga ku hiinsaday isagoon carruurtii iyo haweenkii toona wax uga dhiibin. Markaas dabadeed, ayuu awrtii keligi wada furay.

Hawshii markay u dhammaatay buu qarrog caana ah iyo wan reeruhu xalay shiraysteen, hilbihiis shiilan oo kumbis ah nimankii u keenay.
Soomaalidu soo dhaweynta iyo marti sooridda wax ku gaaraa waa dhif, waana gobannimo lays dheer yahay.

Cabbaar hadday nasteen bay ku yiraahdeen; "Gacaliye afar waxyaaloodba nooga warran:

a) Ninkii xerada looga soo guurey nooga warran.

e) Ninkii jidka soo socdana nooga warran.

i) Adigu waxaad awrtiiyoo taagan keligaa caanaha u dhantayna nooga warran iyo waxa aad kuwa kale uga dhallinyar tahay.

o) Annagana midkaan aabbahayo dhalin noo sheeg.

Suuye; "Ninkaad xerada ku soo aragteen waa noo yaraa, afar xaas oo uu lahaa ayaa afartiiba ku xumaadeen oo afartiisii waaxood la kala haray.
Kan jidka soo socdeyna waa kii noo dhexeeyey. Isagana afar uu lahaa baa labo ku xumaatay, labadii kale dartood buuna ku soo socdaa.
Anigu waxaan awrtiiyoo taagan caanaha u dhamay, waan ku tabaraysanayey, waxa ii dhallin yareeyana waa afar xaas oo aan lahaa oo raalliyooyin ii wada noqday. Idinka kaan aabbihiin dhalin aan idiin sheegee saddexdaas geed kala taga."

Xoogaa markuu joogey buu kii ugu weynaa u yeeray, oo ku yiri; "Maandhoow aan kuu duceeyee xaaskii yaraa oo aabbahaa ka dhintay guurso, xoolahayagana bar qaado." Intuu seef galka ka jiitey ayuu si xanaaqsan u yiri; "Haddaad afkaas mar dambe iigu noqotid unuunkaan ku hor dhigi doonaa!" Suuye odaygii inta baqay; "Geedkaagii tag".
Kii dhexuu haddana u wacay, oo sidii kii hore ku yiri. "Ma hooyadayda labaad baan guursanayaa? Haddaanan dhegta dhiig-

ga kuu darin nimba ma ahi", si cara ah buu u yiri. Markaasuuye, odaygii, "Geedkaagii tag."
Midkii ugu yaraa buu u yeeray, oo sidiiyoo kale riyi. Suuye, "Adeeroow maad iga deysid." "Waan ku gartaye guurso maan-dhoow", odaygii baa ku yiri. Markaasuuye wiilkii; "Haddaad ii garatay kaa yeelay adeer".

Odaygii markuu gartay inaan kan yar aabbohood dhalin, buu inta isugu yeeray ka dhaadhiciyey kuwii kale sida arrintu tahay. Wuxuuna labadii walaalaha ahaa ka codsaday inaan xaaska yar iyo xoolahay haysato midna aan ninkaas lugu fara-gelin.

**M A C N A Y N :**

**harab ah** : wax laf iyo duqoow isku darsaday
**noxosh** : tin wada cad
**u quuddarroonayey** : u hunguriyoonayey
**humhummaagsanaya** : fiirfiirsanaya isagoon dhab u arkayn
**qarrog** : bire, haruub weyn
**kumbis** : hilib shiilan oo bagbagaf ah

**I.** **L a y l i**

**W e y d i i n o.**

1. Goormaa dadku dardaarmaa ?
2. Waxyaalaha waalidku dhashiisa ku dhaafo marka uu dhimanayo maxaa ka mid ah ?
3. Muxuu ninku markuu dardaarmayey wiilasha kuusan dhalin u sheegi waayey ?
4. Waxay wiilashu aad uga nexeen ma jireen ? Waxse ma u dhintay ?
5. Immisa ayaamood bay wiilashu cidday doonayeen u soo socdeen ? Yayse raaskii ugu yimaadeen ?
6. Maxaa cayayaanku odayga indhihiisa ka rabey ? Kuweese u malaynaysaa inay ahaayeen. ?
7. Maxay wiilashu kii dhex soo socdey ula hadli waayeen ?
8. Goormay ciddii ka daba yimaadeen ? Sideese awrtu ahayd ?
9. Ninka awrta wadey muxuu caanaha u dhamay ?
10. Maxaa wiilasha lagu marti sooray ?
11. Sidee ninku wiilkaan odaygu dhalin ku soo saaray ?

**2. Hadalladan hoose macnohooda qor.**

| | |
|---|---|
| u falanqeeyey | caaqiiba gab |
| afar caanamaal | noxosh buu ahaa |
| isku jabsaday | dhagaha culus |
| ul ku tukubaga | milicda awgeed |
| xero tuban | xalay shiraysteen |

**3. Meelaha bambannaan magac-uyaallada qaybtooda ku habboon geli, sida tan u horraysa.**

**Uyaallo**

1) 11 aniga Axmed qalin buu **ii** keenay.
2) ...... Axmed qalin buu ...... keenay.
3) ...... Axmed qalin buu ...... keenay.
4) ...... Axmed qalin buu ...... keenay.
5) ...... Axmed qalin buu ...... keenay.
6) ...... Axmed qalin buu ...... keenay.
7) ...... Axmed qalin buu ...... keenay.
8) ...... Axmed qalin buu ...... keenay.

**4. Erayada aad u madow hadday isdhaafsan yihiin isku toosi.**

1) Dadku hadduu gaboobo **ma tabar** leh.
2) Xoolaha **dhinta dadka** waa la dhaxlaa.
3) Qofkay naftu ka baxdo la **waa** xabaalaa.
4) Dadku **lugeeyo markuu** waa daalaa.
5) Odayga xerada fadhiyey **baa haysey naxdin.**
6) Awrta waa **lagu** guuraa.
7) Carruurta waxaa la saaraa **guradeeda awrta.**
8) Hilbaha **jaad dhawr** baa loo kala bisleeyaa.
9) Shiilimaadku **buu** aad u macaan yahay.
10) Bilciku waa har **weyn** yahay.

5. **Meelaha bambannaan erayada ku habboon geli.**

1) Odaydu ......... dhimanayey ......... dardaarmay.
2) Dadka ......... waa ......... axmaa.
3) Waalidku ......... waa canaantaa, ......... waa ......... .
4) Wiilashu ......... maqleen inaan ......... aabbohod dhalin......... nexeen.
5) Reermiyigu ......... dhaqdaan geel, ......... iyo ......... .
6) ......... awrtuu ......... ku ......... .
q) ......... waxaa ......... baruur ......... idaha.
8) Soomaalidu ......... dhaweynta ......... ku ......... .
9) ......... qaar baan ......... laga xiisa ......... karin.
10) Kumbisku ......... hilib ......... u ......... .

6. **Weerahaan hoose *tii* run ah horteeda R ku dhig, *tii* been ahna B.**

b. Wiilashu dardaarankii aabbohood waa yeeleen. ———
t. Aabbohood laba xaas iyo mid ku mehersan buu lahaa.———
j. Wiilashu muddo yar bay reerkoodii ka maqnaayeen. ———
x. Waxay markii hore jidka ku jireen laba habeen iyo laba maalmood. ———
kh. Odayga xerada fadhiyey waa dhaga la'aa.
d. Wiilashu odaygay jidka ku arkeen waa bariidiyeen. ———
r. Intaan salaadda duhur gelin bay reerkii ka daba yimaadeen. ———
s. Wanka reerku qashay cudur buu u dhintay. ———
sh. Ninku wiilkaan adoogood dhalin faal buu ku arkay. ———
dh. Xeerkeennu ninna inuu aayadi guursado ma oggola.———

# G A B A Y
## (Sayid Moxamed)

**Sayid Maxamed** oo ahaa nin wax badan gobannimada Soomaaliyeed u soo halgamey, ahaana gabyaa weyn, markuu Iimey tegey gabay dardaarana tixo ka mid ah wuxuu ku yiri:

"Dacwaddaa wax loo qoray intii diinta Nebi raacday
Waxna loo dan leeyahay ninkii dawladnimo haysta
Waxna looga digayaa ninkii dagaya Soomaali
Waa idin dagaayaa kufriga ad u debcaysaane
Dirhankuu idiin qubahayaad dib u go'aysaane
Kolka hore dabkuu idin ka dhigin dumar sidiisiiye
Kolka xigana daabaqadda yuu idin dareensiine
Kolka xiga dalkuu idin ku oran duunyo dhaafsada e
Kolka xiga dushuu idin ka rarin sida dameereede
Kol haddaan dulkii Adari iyo Iimey dacal dhaafay
Maxaad igaga digataan berruu Siin la soo dagine".

# RAG XUNTI BUU KA SHEEKEEYAA

Saddex nin oo magacyadooda la kala yiraahdo, Warfaa, Weyrax, iyo Waasuge, ayaa maalin waxay iska waraysteen nin walba wixii wax ugu darnaa intuu ifka joogey. Mid waliba wuxuu islahaa adigaa ugu darnaan doona, waase kala darnaayeen. Iswaraysigoodii waxay ku kala yiraahdeen :

**W a r f a a :**

Anigu maalin baan laba rati dhaanshey, wiil yar oo rajay ahna aqalkii uga tegey. Goortaan gurigii ka jiciirtay yaan dib dhugtey, mise labadii rati mid baa maqan. Kaan wadaan inta geed ku xiray kii kale raadshey.
Meel uu suul iyo ciddi dhigay ayaan waayey, markaasaan kaan geedka ku ogaa ku soo noqday. Saan waxan u imid isagoo xariggii isku bakhtiiyey, haamihiina cayma beeleen.

Anigoo awrtii iyo haamihiiba ka fara maran yaan aqalkii dib ugu noqday, oo wiilkii inta dhabarka u ritey ceelkii la aadey, illlaa waxaan biyo ugu keeno ma hayee. Annagoo beer-caddaad ah, yaan ceelkii oo daasad dheg lihi qarkiisa saaran tahay nimid. Labadaydii go' iyo qayd wiilku guntanaa yaan inta tafaha isugu xiray, oo daasaddii dacal uga xiray ceelkii u ridey.
Markaan u laalaadshey bay iiga fara baxsadeen.

Anigoon suxudsaaxud laygu arag, yarkiina sida gacan-taas yahay yaan meeshii ka tagnay. In door ah markaan soconney, oo aan dhanqalan nahay ayaan ari daaqahaya ku soo baxnáy. Ri' dhashay oo dambarkii ku taagan yahay, arigana noogu soo xigtey baan inta lugta ku dhegey wiilkii qaruufsiiyey.
Markuu haagay, yaan anna mid kale qabsaday. Anigoo sacabsa-naya baa naag ariga la joogtey ul ila dulmartay. Waan dhugtey, mise waa siddohday. Markay i garatay, ayay inta go' ay huwa-neyd ii soo tuurtay dibadda ku dhacday.

Waxaasaa i qabsadaye ma anigaad ila mid tihiin.?

**W e y r a x :**

Allaylehe inaan waxba kugu dhicin. War aniga laba wiil iyo gabar inan ah oo saddexduba raja yihiin ayaa dad laygu arkey, dhega adduunyana dameer keliya. Waxaan kaloo lahaa doon shiraac leh oo aan ku kalluumaysto, isla markaasna aqal noo ahoo aan ku hoyanno kuna hargalno.

Annagoo Ilaah mahaddi iska ladan, oo aan doonta dhexdeedii ayaan dambe kawtan ku cayaarayno baa markab ilu ku wareedhay ka soo muuqday.
Siduu u soo gannaa buu meel agtayada ah Barroosinkii ku xirtay. Doontii baan inta shiraaca u taagey markabkii ka wardoonay, mise niman aana af aqoon baa wata. Markay garteen inaan dad masaakiina nahay, bay xoogaa raashina na siiyeen iyagoon ju' noo oron. Goortaan raashinkii doontii saaray, baan kabahaygii middood tebey. Saamne gabadhii; Abbe kab baa iga maqane markabka iiga soo day." Intay sarakacday bay halhaleel u fuushay.
Markay arkeen in gabadhii xaggooda soo jirto, intayadii kalana doontii, bay markabkii dhaqaajiyeen.
Markaan ogaadey inay inantii la baxsadeen, ayaan doontii inta shiraacii u dhuujiyey iskala daba rogey. Haddaan in door ah daba ordayey, yaa duufaan yaab lihi baalka nagu qaadday oo na harqisay. Anigu sida kalluunkaan dabaasha u aqiin, alwaax jabki aan gacanta la helay baana i gargaarey.

Doontii, dameerkii, wiilashii iyo gabadhaydii aan mid loo dhigo habari koolin halkaasaa iigu dambeysaye, ma waxa i qabsadaa idin qabsaday?

**W a a s u g e :**

Labadiinna toona warra'i ma qabsan. Anigu marna malaggeygii baan arkay, marna waan ceeboobey!
Waa marka horee, annagoo siddeed nin ah ayaa col na qabtay. Dawlis ay siteen bay luqunta nooga wada xireen, oo na farfariisiyeen. Anigu midigtaan ugu xigey, nin noogu fiicnaa oo magiciisa Caynab la oran jireyna bidixda.

Mid iyaga ugu xoog badnaa yaa Seef inta galka ka jiitey Caynab madaxa uga gooyey, oo ma joogsane lixdii noo dhexaysana haddiiba unuunka ka wada jaray. Markuu aniga ii hoⁿbaday baan u gooyey, oo dibadda ku dhacay anoo dawliskii jiidanahaya.
Maalintiiyoo dhan markay i cayrinayeen bay dan cad iiga hareen.

Afar caanamaal haddaana dad iyo duuyo toona arag, yaan reerkaan gabadha ka qabey guure ugu imid. Markay diifta iga muuqata arkeen bay biyo aan ku haqab beelay i siiyeen, raar faraqu dheeraaday oo dumaashidey lahaydna aqalkii soddoggay la iigu gogley.

Wan subag madoobe ah oo iska caddaaday, yaa la ii qalay. Intaan hilbihiisii sugayey waxaa la iiga soo hor marshey toobke caana ah, oo hal ayaamahaas dhashay laga soo lisay.
Wax yar haddaan joogey, baa xeero afku intaa le'eg yahay oo caddiin u badan iyo baaquli maraq ah la ii keenay. Wixii oo dhan ayaan feeraha dhigay, dabadeedna madaxa iyo minjaha duubtay.
Gogoshaan ku hurdey baan intaan jiifey ku banay, illaa nin-kaas qatooyada ku raagey oo baruurta iyo caanaha geel iska bedshey baan ahaye.

Markii waagu beryey, ayaa dumaashidey alaabtii soo doontay. Aqalkii markay foodda soo gelisey baa bankii u uray, markaasay, "Uf" tiri, oo carartay. Sharqanteedii baan ku toosay, mise gal baan ku dhex jiraa.
Cimaamad soddoggay lahaa, oo alool aqalka iigu ilxirnaa sur-rayd baan inta guntadey cagaha wax ka dayey.

Saasaa i qabsataye yaa iga daran ?

**M a c n a y n :**

| | | |
|---|---|---|
| **jiciirtay** | : | fogaadey |
| **sida gacantaas** | : | qaawan |
| **qaruufsiiyey** | : | afka ugu lisay |
| **haagay** | : | dhergey |
| **kawtan** | : | jaad cayaarta ka mid ah (alla shan dhagax oo yaryar baa lagu cayaaraa). |
| **tebey** | : | ogaadey inay maqan tahay |
| **warra'i** | : | balo, wax daran |
| **unuunka** | : | madaxa |
| **ii hogbaday** | : | damcay inuu i dilo, ii hunguriyoodey |
| **diifta** | : | foolxumada oonka iyo gaajadu ku wacan yihiin |
| **haqab beelay** | : | deeqay, ka dhergey. |
| **toobke** | : | haruub weyn, bire ama qarrog |

1. **L a y l i**

**W e y d i i n o : I**

1) Markay saddexda nin iswaraysanayeen maxaa mid waliba islhaa ?

2) Warfaa markuu dhaanshey yaa gurigii ku haray ? Goormuuse awrkii tebey ?

3) Maa dhex awrkii geedka ku xirnaa ? Sideese haamihii noqdeen ?

4) Muxuu Warfaa wiilka u xambaartay ?

5) Ceelka qarkiisa wax ma laga helay ?

6. Markii uu rida dambe qabsaday, Warfaa soddohdi ma arkayey ?

7) Weyrax dad iyo duunyo muxuu ka lahaa ?

8) Markay Weyrax iyo carruurtiisu markabka arkeen maxay ku hawshaysnaayeen ?

9) Nimanka markabka watey kuwii kale ma la hadleen ?

10) Muxuu Weyrax gabadha markabka ugu diray ?

**2.**

**W e y d i i n o : 11**

1. Goormaa markabkii dhaqaaqay ?
2. Nimanka markabka watey gabadha ma xadeen ?
3. Weyrax muxuu badda ugu harqan waayey ?
4. Waasuge iyo jaallayaashi markii laysku xiray, xaggee buu u xigey ?
5. Markuu Waasuge cararay maxaa surkiisa ka muuqdey ?
6. Markuu Waasuge soo cidgalay dad yuu ugu soo hor maray ?
7. Raarkii loo gogley yaa lahaa ?
8. Hurdadii markuu Waasuge ka kacay muxuu arkay ? Muxuuse guntadey ?

3. **Xarfaha labanlaamma oo weero ku jira iyagoo marna fudfudud marna adadag.**

**B**

1. **Xabadkaan** ninkii **xabbad** ku dhuftay.

**D**

2. Adigu **riddadaadii** ma ad **ridan.**

**R**

3. **Carabku carrabkuu** la' yahay.

**G**

4. **Ruugga** lafaha wada **ruuga.**

**L**

5. Aabbe **shilin** buu **shillinkii** kaga tegey.

**M**

6. Intaan caanaha **dhammaan dhamaan** seexan.

**N**

7. **Jannaan** aakhiro **janaan** u nahay.

4. **Waxaad dhigtaa toddoba weerood oo toddobada xaraf oo labanlaamaa ku jiraan, iyagoo fudayd iyo adaygba leh.**

5. **Hadalladaan hoose macnohoodu siduu meeriska ugu jiro qor.**

suul iyo ciddi dhigay
cayma beeleen
suxudsaaxud lagu arag
dhanqalan nahay
ul ila dulmartay
afar caanamaal
subag madoobe
qatooyada ku raagey

6. **Meelaha khaldan sax.**

1. Raggu **xuntooda** ma qarsado.
2. Haweenku ragga waa ka sheex badan **tahay**.
2. Qofkii rajay ah **hooyadeed** ma noola.
4. Warfaa wax daran baa **qabsatay.**
5. **Dameeruhu** waa lagu qoryaystaa.
6. Ninkaan malaggi gelin ma **dhimato.**
7. **Ceebta** ninna feer ma jabiso.
8. Xididku waa kala **xishootaa.**
9. Markabtu birriga ma mari **karo**.
10. Saddexda nin midba **midda** kale waa ka darnaa.

7. **Meelaha bambannaan erayada ku habboon geli.**

1. Nin ......... wuxuu islahaa ......... u darnaan ......... .
2. Warfaa ......... aqalkii .........fogaadey buu ......... eegay.
3 Awrkii ......... ku xirnaa ......... buu isku ......... .
4. Warfaa iyo ......... ceelkii ......... kama ......... .
5. Weyrax ......... dameer ......... ka ......... .
6. Doontu ......... bay ......... iyagana ......... bay u ahayd.
7. Gabadhii ......... baa la ......... wiilashiina waa ......... .
8. ......... alwaax ......... ka jabay ......... gargaarey.

8. **Weerahaan hoose tii run ah horteeda R. ku qor, tii been ahna B.**

b. Ina Warfaa hooyadi baadi bay ku maqnayd. ———
t. Ceelka qarkiisa koombaa saarnayd. ———
j. Naagtu markay ninka qaawan oo rida ku dheggan aragtay bay dhawaaqday. ———
x. Waasuge iyo raggii la socdeyba duullaan bay ahaayeen.———
kh. Colku nimankay qabteen qaar baa ka dhuuntay. ———

d. Waasuge markuu xididki u yimid, raar baa meel dugsoon loo dhigay. ———

r. Habeenkii si wanaagsan baa Waasuge loo marti sooray. ———

s. Markuu toosay buu Waasuge cimaamad seeddigi lahaa oo alool surrayd qaatay. ———

# JAWAABIHII HALXIRAALAYAASHA

**Bogga L. 34**

**Qaybta googaaleysiga**

4. Barkinta iyo aqalka
5. Halaqa
6. Digsiga iyo saddexdiisa dhardhaar
7. Duddunta
8. Qorraxda, Xiddigaha iyo Dayaxa
9. Injirta
10. Yaambada
11. Buntukha
12. Kasha
13. Geela naasihiisa iyo doobiga
14. Biciidka
15. Geesaha ariga

**Bogga L. 66**

**Qaybta gabayada**

1. Bisha
2. Dabka
3. Orgiga
4. Ilaah nagama suurine Saacaddaan xiranno weeyaane.
5. Waa durdurrada Joqraafaha ku yaal oo dunida meeraaya.

# T U S M O


1 — NIN IYO AFADI . . . . . . . . . . . . . . . . 1
2 — LABALABO (murti) . . . . . . . . . . . . . 4
3 — LIBAAX IYO DHURWAAYO . . . . . . . . . . 6
4 — GABAY (Moxamed Ismaciil) . . . . . . . . . 10
5 — NIN WAALAN . . . . . . . . . . . . . 11
6 — SACLE IYO DAMEERLE . . . . . . . . . . . 14
7 — QOSOL IYO MAAD (sacab iyo haasaawe) . . . . . 18
8 — DAWOCO IYO DHURWAA . . . . . . . . . . . 19
9 — WIIL IYO AABBIHI . . . . . . . . . . . . . 22
10 — WAXAAN WAX LA MID AH U BAAHNAYN (murti) 26
11 — GARDARRAA MA GUULEYSTO . . . . . . . . . 27
12 — D I I N . . . . . . . . . . . . . . . . 31
13 — HALXIRAALE (googaaleysi) . . . . . . . . . . 34
14 — BAHALLO IYO GOROYO . . . . . . . . . . . 35
15 — G A B A Y (Cali Xuseen) . . . . . . . . . . 39
16 — D A D Q A L . . . . . . . . . . . . . . . 41
17 — A B W A A N N I M O . . . . . . . . . . . . 45
18 — QOSOL IYO MAAD (afar nin iyo jamaaco) . . . . 49
19 — A W B A A L L E . . . . . . . . . . . . . . 50
20 — D O Q O N (murti) . . . . . . . . . . . . 55
21 — I I M A A N B A D N I . . . . . . . . . . 57
22 — N A A G M A S A Y R T A Y . . . . . . . . 61
23 — HALXIRAALE (gabayo dhawr ah) . . . . . . . 66
24 — CATIR - CAANA - KU - DHUUQE . . . . . . . . . 67
25 — DAACAD, SIRROOW IYO BEENLOW . . . . . . . 73
26 — QOSOL IYO MAAD (dhurwaa) . . . . . . . . . 79
27 — ROONAANA RABBAA OG . . . . . . . . . . . 80

28 — DARDAARAN AABBE . . . . . . . . . . . . . 85
29 — G A B A Y (Sayid Moxamed) . . . . . . . . . 90
30 — RAG XUNTI BUU KA SHEEKEEYAA . . . . . . 91
31 — JAWAABIHII HALXIRAALAYAASHA . . . . . . 98

*Waxaa lagu daabacay*
*Wakaaladda Madbacadda Qaranka*

QIIME SH.SO.5